Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
*Office of the President*

**Taariikh: 26/12/2019**

**SHARCI LR. 18 8**
**ANSIXINTA SHARCIGA SHIRKADAHA**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Lr.GSH455/12/19 taariikh 25/12/2019 kuna saabsan ansixinta Sharciga Shirkadaha

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Shirkadaha.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 26/12/2019**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/003/2020
TAARIIKH 8/1/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Speaker

Lr. GSH 455 /12/19

Mogadishu, December 25, 20

Ku: Madaxweyanaha Jmahuuriyadda Federaalka soomaaliya
Muqdisho

Og: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka
Muqdisho

Og: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka
Muqdisho

Og: Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga , W& M/Gashiga ee Golaha Shacaka .
Muqdisho

√Og: Garyqaanka Guud ee Dawladda
Muqdisho

Og: Hantidhawrka Qaranka
Muqdisho

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
Muqdisho

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka
Muqdisho

Ujeedo: Soo Gudbin H/Sharciyeedka Shirkadaha

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, H/Sharciyeedka Shirkadaha ee halkaan ku lifaaqan waxa gudbiyey Xafiiska R/Wasaaraha XJFS. Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii talogalay marsiiyay Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga, Warshadaha & Maal Gashi Golaha Shacabka. Ugu danbayna wuxuu Goluhu aqbalay wax ka badelkii Aqalka S ku soo sameeyey isla markaana waxuu Golahu ku ansixiyay H/Sharciyeedkan Kalf

6-aad kulankiisii 26-aad taariikhdu markay ahayd 25/12/2019, codayntuna sidaan ayay dhacaday:

**Guntin: 156;** **Oggol: 156;** **Diiday: 0;** **Ka aamustay: 0;**

Hadaba M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ogolaato Xeer Madaxweyne, looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Iga Guddoon Salaan Qiimo iyo Qadarin Xanbaarsan

**M.ne Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya**

Tell: +252 612224442/+252 615577472
E-mail. speaker@parliament.gov.so Website: www.parliament.go

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/366/B-10/19

Taariikh: 05/12/2019 التاريخ

| | | |
|---|---|---|
| Ku:- | Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS | =Muqdisho= |
| Og: | Xoghayaha Guud ee Aqalka Sare BFS | =Muqdisho= |
| Og:- | Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda | =Muqdisho= |
| Og:- | Guddiga Maaliyadda ee Aqalka Sare BFS | =Muqdisho= |
| Og:- | Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya | =Muqdisho= |
| Og:- | Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya | =Muqdisho= |

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Shirkadaha)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-10/KF6/05/2019** kuna taariikheysan **30ka Nofembar 2019** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Shirkadaha:**

- Waxaa codeeyay: **28 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **27 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **1 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad u gudataan waajibka dastuuriga ee la idin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# ANSIXINTA SHARCIGA SHIRKADAHA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 28 | 27 | 0 | 1 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| **Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi** | **Taariikh:** 30ka Nofembar 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| **Sen. Abshir Maxamed Axmed** | **Taariikh:** 30ka Nofembar 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| **Sen. Mowliid Xuseen Guhaad** | **Taariikh:** 30ka Nofembar 2019 |

**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Golaha Shacabka**
**Xafiiska Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad**

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مجلس الشعب**
**مكتب النائب الأول لرئيس المجلس**

**Federal Republic of Somalia**
**House of the People**
**Office of the 1st Deputy Speaker**

**Ref:** /5/1stDS/B-10/19 :الرقم **Mogadishu,** May 21, 2019: التاريخ

**Ku:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare**

**Og:** **Madaxweyanaha Jamahuuriyadda Federaalka soomaaliya**

**Og:** **Ra'iisul wasaaraha XFS**

**Og:** **Guddiga Ganacsiga iyo Warshadaha**

**Og:** **Garyqaanka Guud ee Dawladda**

**Og:** **Hantidhawrka Qaranka**

**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka**

**Og:** **Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka**

Ujeedo: Soo Gudbin Hindise-sharciyeedka Shirkadaha

Mudane Guddoomiye, Mudanayaal

Sida aad la socotaan, Hindise Sharciyeedka shirkadaha Guud ee Qaranka ee halkaan ku lifaaqan waxaa soo gudbisay wasaaradda ganacsiga iyo warshadaha ee XFS, Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Ganacsiga iyo Warshadaha ee Golaha Shacabka ayadoo xildhibaanada ay kaga doodeen akhrinta 2aad. Ugu danbayna wuxuu Goluhu ku ansixiyay Hindise sharciyeedk Kalfadhiga 5-aad fadhigiisa 13aad taariikhdu markay ahayd **11/5/2019,** codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 142;** **Diiday: 0;** **Ka aamustay: 0**

Mudane Guddoomiye waxaa halkaan ku lifaaqan nuqulka Hindise-sharciyeedka uu Golaha Shacabku ansixiyay, iyo dukumentiyo sharaxaya heerarkii kala duwanaa ee uu soo maray, wax kabadalladii lagu sameeyay hindise-sharciyeedkaan, si aad oga gudataan waajibkiina dastuuriga ah.

**Hon. Abdiweli Ibrahim Sheikh Mudey**
**K/S Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna**
**Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad ee Golaha Shacabka**

# HINDISE-SHARCIYEEDKA SHIRKADAHA

## Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS

**Tirada Xubnaha Codeysay 142: Oggol: 142; Diiday: 0; Ka aamustay: 0;**

| | |
|---|---|
| **Saxiix: M.ne Cabdiwali Ibraahim Sheekh Muudey** | **Taariikh: May 21, 2019** |

## Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

| | |
|---|---|
| **Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad** | **Taariikh: May 21, 2019** |

## Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

| | |
|---|---|
| **Saxiixa: Mudane Cabdikarim Xaaji Cabdi Buux** | **Taariikh: May 21, 2019** |

Golaha Aqalka Sare
The Upper House
13 JUL 2019
SOO GELID / RECEIVED

JAMHUURIYADDA FEDERALKA SOOMAALIYA GOLAHA SHACABKA
THE FEDERAL PARLIAMENT OF SOMALIA REPUBLIC
HOUSE OF THE PEOPLE
GOLAHA SHACABKA

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
*Xafiiska Madaxweynaha*

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

**Federal Republic of Somalia**
*Office of the President*

**SHARCI LR. 18**
**ANSIXINTA SHARCIGA SHIRKADAHA**

**Taariikh: 26/12/2019**

**MADAXWAYNAHA J.F.S**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka Lr.GSH455/12/19 taariikh 25/12/2019 kuna saabsan ansixinta Sharciga Shirkadaha

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Shirkadaha.

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 26/12/2019**

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA SHIRKADAHA

**Sharci Lr. ________ ee __________**
**Sharciga Shirkadaha**

# CUTUBKA 1^AAD^

## Qodobka 1^aad^

## Ujeeddada Sharciga

Sharcigani:

1. Wuxuu nidaaminayaa qaabka howlaha shirkadaha ganacsiga ee Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. In uu nidaamiyo diiwaan-gelinta shirkadaha iyo hawlahooda maamul.

## Qodobka 2^aad^

### *Eray Bixin*

Haddii aan si kale loogu qeexin shrci kale, erayada soo socda wuxuu mid waliba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

1. **"Cinwaan"** waxaa loola jeedaa cinwaanka warqadaha lagu diro ama cinwaanka Sekedda/ waddada goobtu ku taallo.
2. "**Ganacsi"** waxaa loola jeedaa howl kasta oo sharci ah oo ay ku jirto yeelashada hanti oo laga filayo in faa'iido laga dheefo.
3. **"Shirkad"** waxaa loola jeedaa shirkad lagu aasaasay si waafaqsan sharcigan ama shirkad horay u jirtay oo la waafajiyey xeerkan.
4. **"Xeerka shirkadaha"** waxaa loola jeedaa xeerka shirkadaha ee JF Soomaaliya ama xeerhoosaadyada shirkadaha.
5. **"Magac shirkadeed"** waxaa loola jeedaa magaca shirkadda ee lagu tilmaamay qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraalka aasaaska wax ka beddelka lagu sameeyay si waafaqsan qodobka **16** ama qodobka **17** ee xeerkan.
6. **"Xeerka shirkadda"** waxaa loola jeedaa qoraalka loo diiwaangeliyay shirkadda ama xeer hoosaadka shirkadda.
7. **"Shirkadaha isku biiraya"** waxaa loola jeedaa mid kasta oo ka mid ah shirkadaha wax ku biiraya iyo shirkadda soo haraysa.
8. **"Qoraalka shirkadda ee la diiwaangeliyay"** waxaa loola jeedaa qoraalka diiwaangelinta shirkad jirtay ama qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraal kale oo la mid ah oo ay diiwaangelisay ama loo diiwaangeliyay shirkad si waafaqsan sharciga dalka ee shirkadda lagu aasaasay ama shirkaddu ka heshay jiritaankeeda shirkadnimo ama shirkadda iyo mulkiilayaasheeda ku helaan sifada masuuliyadda

xaddidan (limited liability). Marka qoraalka la diiwaangeliyay wax laga beddelay ama dib loo qoray, qoraalka la diiwaangeliyay waxaa loola jeedaa wax-ka-beddelka ama dib-u-qorista u danbeysay.

9. **"Diiwaan-haye"** waxaa loola jeedaa diiwaanhayaha Wasaaradda Ganacsiga.
10. **"Isku-darsi" (contribution**) waxaa loola jeedaa wax kasta oo qiime leh oo qof ku darsado shirkad si uu uga noqdo saamile shirkadda ama isagoo ka ah saamile shirkadda, waxaa uu ku darsanayo waxay isugu jiri karaan lacag, hanti ama adeeg la bixiyay ama qoraalka ballanqaadka "promissory note" ama waajibaadka kasta oo kale oo qabanaya si uu ugu darsado lacag, hanti ama gudashada adeeg.
11. **"Maxkamad"** waxaa soo galaya maxkamad kasta iyo garsoore walba oo ikhtisaas/awood u leh dacwad.
12. **"Shirkad tahli-waa ah" (delinquent company)** waxaa loola jeedaa iyada oo laga duulayo qodobka **73[aad]** inuu yahay mid awoodi kari waysayin ay fulso wixii sharcigu faray, waajib ka dhashay heshiis ama dayn la bixin wayay.
13. "**Shirkad waddani ah"** waxaa loola jeedaa shirkad, urur ama isu-tag lagu aasaasay xeer dhaqangal ka ah JF Soomaaliya ama sharciga Soomaaliya uu maamulo xiriirka ka dhaxeeya mulkiilayaasha dhexdooda ama mulkiilayaasha iyo ururka ama isu-taga una aqoosan yahay sharciga Soomaaliya shirkad sharci ah oo gaar ah.
14. **"Taariikhda dhaqangalka"** marka laga hadlayo qoraal uu diiwaangeliyay diiwaanhayaha, waxaa loola jeedaa waqtiga iyo taariikhda loo go'aamiyay si waafaqsan qodobka **87[aad]** ee xeerkan.
15. **"Taariikhda dhaqangalka ee kala diridda shirkadda"** waxaa loola jeedaa taariikhda dhaqangalka qoraalka kala diridda shirkadda ama taariikhda ku dhigan diiwaannada diiwaanhayaha ee garsoorka shirkadda kala diray ama iskeed u kala dirantay ka dib markii uu dhacay muddadii jiritaankeeda.
16. **"Shirkad jirta"** waxaa loola jeedaa shirkad jirtay dhaqangalka xeerkan ka hor.
17. **"Shirkad shisheeye oo jirta"** waxa loola jeedaa shirkad shisheeye ee ka fulin jirtay ganacsi ama howl kale JF Soomaaliya ka hor dhaqangalka xeerkan.
18. **"Khidmad"** waxaa loola jeedaa khidmad ay qaado wasaaradda ganacsiga sida ku cad qodobka **86** ee xeerkan waxaan ku jira khidmadaha loogu soo rogo ganaax ahaan dib u dhac diiwaangelin ama sabab kale.
19. **"Qoraal la diiwaangeliyay"** waxaa loola jeedaa qoraal uu qabtay diiwaanhayaha si waafaqsan xeerkan, ha noqdo qoraalkaasi mid dhaqangal ama mid aan dhaqangelin.
20. **"Shirkad shisheeye"** waxaa loola jeedaa shirkad, urur ama isu-tag loo aasaasay si waafaqsan sharciga dal kale ee maamula xiriirka ka dhaxeeya mulkiilayaasha dhexdooda una aqoonsan yahay sharciga dalkaasi shirkad sharci ah oo gaar ah.
21. **"Magaca shirkad shisheeye"** waxaa loola jeedaa:
    **b)** Magaca shirkad shisheeye oo loo oggolaaday in ay ka qabato ganacsi ama ka fuliso howl gudaha JF Soomaaliya, ha noqdo magacaasi mid sax ah ama magac

shirkadeed la qaatay, magacaas oo loo beddeli karo si waafaqsan qodobka **20aad** ee xeerkan.

**t)** Magaca saxda ah ee Shirkadda shisheeye ee aan loo oggolaan in ay ka qabato ganacsi ama ka fuliso howl gudaha JF Soomaaliya.

22. **"Habka waraaqo diridda"** waxaa loola jeedaa ku diridda waraaqo hannaanka boostada ama hab kale oo waraaqaha lagu diro kaas oo si habboon loogu socodsiiyo cidda loo dirayo.

23. **"Maareeye"** waxaa loola jeedaa:

    **b)** Saamile ka tirsan shirkad ay maamulkeeda leeyihiin saamilayaasha;

    **t)** Maareeye marka maamulka shirkadda ay leeyihiin maareeyayaal balse aanay gacanta ugu jirin saamilayaasha;

    **j)** Qof loo xilsaaray inuu noqdo maareeye shirkad si uu u maamulo shirkadda si waafaqsan qodobka **37aad** ee xeerkan;

    **x)** Qof xilka uu ka hayo shirkaddu sida ku dhigan xeerka shirkadda ama sharcigu uu yahay mid u dhigma shaqo ahaan xilalka ku dhigan xubnaha **(b),** ilaa **(j)** ee faqraddan

24. **"Saamile"** waxaa loola jeedaa qof ku leh dan lahaansho shirkad oo leh xuquuqaha iyo waajibaadka ku dhigan xeerkan. Marka shirkaddu leedahay hal saamile, erayga saamile ama saamilayaal waxaa loo qaadanaa saamilahaas keliya.

25. **"Dan saamile"** waxaa loola jeedaa saamiga saamile ee faa'iidada iyo khasaaraha shirkadda iyo xaqa uu ka helo qaybtiisa marka la qaybinayo hantida shirkadda.

26. **"Shirkadaha wax ku biiraya" (acquisition)** waxaa loola jeedaa shirkad ku biireysa shirkadda soo haraysa si waafaqsan xeerkan ama si waafaqsan xeerka aasaasiga ah shirkadda.

27. **"Waajib"** waxaa loola jeedaa dayn, masuuliyad ha ka dhalato gashi (tort), heshiis ama si kale.

28. **"Sharci"** waxaa loola jeedaa marka uu la xiriiro shirkad:

    **b)** Xeerkan;

    **t)** Sharciga lagu aasaasay shirkad ha noqdo mid Soomaali leedahay ama dal kale;

    **x)** Shuruucda kale ee Soomaaliyeed ama dalal kale ee maamula qaab dhismeedka iyo maamulka gudaha shirkadahaas;

29. **"Mulkiile"** waxaa loola jeedaa Saamile ama qof ku leh dan u dhiganta dan mulkiile shirkad.

30. **"Qof"** waxaa loola jeedaa qof caadi ah, shirkad, iyo wax kasta oo leh shakhsiyad qaanuuni ah.

31. **"Xafiis guud"** waxaa loola jeedaa xafiiska shirkadda ee ku yaal cinwaanka xafiiska guud ee shirkadda.

32. **"Dhageysi"** waxaa loola jeedaa dacwad madani ah, garqaadis, dhexdhexaadin, dacwad ciqaab, tallaabooyin maamul ama baaritaan.

33. **“Helid”** marka ay la xiriirto helidda qoral ay heshay shirkad, waxaa loola jeedaa in loo gacan geliyay shirkadda qoraalkaas.
34. **“Warbixin ama warbixin sannadeed”** waxaa loola jeedaa warbixinta uu waajibiyay qodobka **72aad** ee xeerkan.
35. **“Shirkad warbixineysa”** waxaa loola jeedaa shirkad kasta oo waddani ah, taas oo sharcigeedu uu ku jiro diiwaannada diiwaanhayaha iyo shirkad kasta ee shisheeye oo loo oggolaaday in ganacsi ama howl ka fuliso gudaha JF Soomaaliya.
36. **“Shirkad aan warbixineyn”** waxaa loola jeedaa marka shirkadda la kala diro ama ay noqoto tahliwaa ama ay iska dhiibto oggolaanshihii ay haysatay ee ganacsi ama howl fulin kale ee gudaha JF Soomaaliya, waxay noqoni mid warbixineysa marka dib loo soo celiyo sida waafaqsan cutubka 11 ee xeerkan, shirkad tahliwaa waxay markale noqoni mid warbixineysa marka laga saxo tahliwaaga si waafaqsan qodobka **75aad** ee xeerkan.
37. **“Qoraalka wax-ka-beddelka”** waxaa loola jeedaa qoraalka wax-ka-beddelka ee ku tilmaaman qodobka **90aad** ee xeerkan.
38. **“Qoraalka sixitaanka”** waxaa loola jeedaa qoraalka sixitaanka ee ku tilmaaman qodobka **89aad** ee xeerkan.
39. **“Qoraalka oggolaansho siinta shirkad shisheeye ee jirta”** waxaa loola jeedaa qoraalka oggolaansho siinaya shirkad shisheeye sida ku cad qodobka **101aad** ee xeerkan.
40. **“Qoraalka aasaaska”** waxaa loola jeedaa qoraalka aasaaska ee ujeeddadiisu tahay in lagu aasaaso shirkad sida ku cad qodobka **12aad** ee xeerkan, qoraalkaas oo ku jira diiwaanka diiwaanhayaha. Qoraalka aasaaska waxaa ku jiri kara wax-ka-beddel lagu sameeyay qoraalka aasaaska, qoraalka aasaaska dib loo qoray, qoraalka iskubiiridda iyo qoraal kasta oo lagu kaydiyey diiwaanka diiwaanhayaha kuwaas oo wax ka beddelaya ama kaabaya qoraalka aasaaska asalka ah ama wax laga beddelay.
41. **“Qoraalka isku biiridda”** waxaa loola jeedaa qoraalka isku biiridda ee lagu tilmaamay qodobka **53aad** ee xeerkan.
42. **“Qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta”** waxaa loola jeedaa qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta ee la geliyay diiwaannada diiwaanhayaha iyada oo ujeeddadu tahay in la diiwaangeliyo shirkad jirta. Qoraalka diiwaangelinta shirkad jirta waxaa ku jiri kara wax-ka-beddelka diiwaangelinta shirkadda, dib u qorista qoraalka diiwaangelinta, qoraallada isku-biiridda iyo qoraal kasta ee la geliyay diiwaannada diiwaanhayaha ee leh raad wax-ka-beddelid.
43. **“Cinwaanka sekedda/baloogga/waddada”** waxaa loola jeedaa magaca iyo lambarka sekedda/baloogga/waddada, magaalada, gobolka, dalka, furaha boostada oo waraaqo lagu gaarsiin karo. Haddii aanu jirin cinwaanka noocaa ah waxaa loola jeedaa tilmaanta ugu habboon oo lagu sheegayo sida ugu suurtagalsan goobta shirkadda.

44. **“Shirkadda soo haraysa” (the acquiring company)** waxaa loola jeedaa shirkadda uu ku biiray shirkad ama shirkado sida si waafaqsan qodobka **54aad** ee xeerkan ama si waafaqsan sharci kale oo aan ahayn xeerkan
45. **“Magaca saxda ah”** marka ay la xirrirto qof caadi ah waxaa loola jeedaa magaca oo saddexan ee qofka; marka ay la xirrirto saamileyda/mulkiilayaasha waxaa loola jeedaa magaca saxda ah ee qof kast oo ka mid ah, marka ay tahay shirkadna magaca shirkadda, marka ay tahay shirkad shisheeyana magca shaqaynaya ee shirkadaas.

## Qodobka 3aad

### *Magaca Sharcigan*

1. Sharcigan waxa lagu magacaabaa Sharciga Shirkadaha ka ganacsada Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 4aad

### *Fasiraadda Sharciga*

1. Sharcigan waxaa loo fasiranayaa si waafaqsan Xeerka Madaniga Soomaaliyeed, Dastuurka JFS iyo danta guud ee mabaadii’da shuruucda caalamiga ah.

# CUTUBKA 2AAD

# AWOODAHA SHIRKADAHA IYO HAWLAHOODA

## Qodobka 5aad

### *Ujeeddada Shirkad Ganacsi*

1. Shirkad ganacsi waxa noqon karaa ama lagu aasaasi karaa marka shaqsi/shaqsiyaad isku darsadaan hanti si waafaqsan Sharciga oo lagu maacaabo saamiley kuna howlan ganacsi faaido doon ah si waafaqsan shuruucda dalka waxna u dhimeyn asluubta iyo anshaxa suuban ee bulshada.

## Qodobka 6aad
### *Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ee Shirkadaha*

1. Shirkad kasta waxay yeelanaysaa shaqsiyad qaynuuni goorta laga diiwaan geliyo Maxkamadda awoodda u leh taas oo noqonaysa halka ay Xarunta Dhexe ee shirkaddu ku taal. Shirkadda marka la diiwan geliyo, waxay yeelanaysaa dhammaan xuquuqaha, waajibaadka iyo tasarufka sharcigu siinayo/saarayo sida; yeelasho hanti, ka qeyb gal dacwo iyo gelid heshiisyo iwm.

## Qodobka 7aad
### *Noocyada Shirkadaha*

Shirkad kasta oo doonaysa in la diwaan geliyo waa in ay ahaato

1. Shirkad Gaar ah.
   **b)** Shirkad Sahlan Waa shirkad uu leeyahay shaqsi, qoys iyo saaxibo kooban.
   **t)** Shirkad masuuliyadeeda xaddidan, waa shirkad deynteeda u soo gudbeyn saamileyda.
   **j)** Shirkad aan masuuliyadeeda xaddidneyn, waa shirkad deynteedu u soo gudbeyso saamileyda.
2. Shirkad Dadweyne
   Shirkad saamiley: waa shirkad raasumaalkeeda u qeybsan yahay saamiyo lehna madax banaani hantiyeed, xubnaha shirkaduna ay ka badan yihiin 50 saamile.

## Qodobka 8aad
### *Sifooyinka Shirkad Gaar ah iyo Shirkad Dadweyne*

1. Shirkadda gaarka ah waxay leedahay sifooyinkan:

   **b)** Xuquuqda saamile oo ka xadiddan si uu cid kale ugu wareejiyo saamigiisa.
   **t)** Tirada saamileyda shirkadda oo ku xadiddan ilaa 50 saamile.
   **j)** Waxaa ka reebban in la faafiyo iibsiga saamigeeda.
   **x)** haddii shirkad gaar ah ay gaarto 50 xubnood waxay si toos ah u noqonaysaa shirkad dadwayne.
2. Shirkad dadweyne waxay leedahay sifooyinkan:
   **b)** Saamileydu waxay wareejin karaan saamiyadooda.

**t)** In xeerkeedu diideyn in dadweynaha loo fasaxo gadashada saamiyada iyo amaahda shirkadda.

**j)** In xeerkeedu ku xadidan yahay xubnaha ugu yaraan toddoba xubnood iyada oo aan xad loo yeelin tirada ugu badan ee xubnaha;

3. In shahaadada lagu aasaasay ay qeexayso in ay tahay shirkad dadweyne.

## Qodobka 9aad

### *Adeegsashada Awood Qaldan*

1. Maamulayaasha shirkaduhu, haddii ay adeegsadaan awood ka baxsan midii shirkaddu u igmatay, waxay si wadajir ah ama shaqsi ahba mas'ul uga noqonayaan dhibka iyo xuquuqaha ka dhasha falkoodaas.

## Qodobka 10aad

### *Xiriirrada ganacsi ee dibedda*

1. Sharcigani wuxuu u oggol yahay shirkadaha Dalka ee lagu diiwaangeliyey si waafaqsan sharcigan in ay ka ganacsan karaan dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba.

## Qodobka 11aad

### *Masuuliyadda Saamileyda*

1. Haddii shirkad dadweyne ay gudan weydo waajibaadkeeda ballan qaad dhaqaale ama ay dhowri weydo heshiisyada, nidaamka sharcigani farayo looma raacan karo saamileyda shirkadda, balse hantida saamilaha shirkadda gaarka ah waxay damaanad u tahay waajibaadka shirkadda.

# CUTUBKA 3AAD

# AASAASIDDA

## Qodobka 12aad

### *Aasaasidda Shirkadaha*

1. Shirkad waxa aasaasi kara qof ama kabadan kana yareyn 18 sano xiskooduna dhan yahay iyo shirkad ama shirkado iyo shakhsiyaad caadi ah oo isku darsaday hanti si ay faaido ganacsi iyo dan kale oo sharuucda dalka ka hor imaaneyn.

## Qodobka 13aad

### *Qoraalka Aasaasidda*

Qoraalka lagu aasaasayo shirkadda waa in laga helaa.

1. Magaca shirkadda.
2. Astaanta shirkadda.
3. Ujeedooyinka shirkadda
4. Raasamaalka shirkadda iyo sida loo kala leeyahay saamiyada.
5. Nuuca ganacsiga shirkadda
6. Cinwaanka Xarunteeda dhexe ee shirkadda.
7. Magacyada oo sadaxan iyo cinwaannada la gala xiriiri karo aasaasayaasha shirkadda.
8. Magaca/yada golaha hogaaminta ee shirkadda iyo shakhsiga/shaqsiyaadka mas'uulka ka noqonaya maamulka shirkadda iyo ciwaanadooda.
9. Wax kasta oo lagama maarmaan u arkayaan dadka aasaasaya shirkadu ay ku daraan qoraalka aasaasidda.

## Qodobka 14aad

### *Dhaqan galka diiwaan gelinta qoraalka aasaaska*

1. Shirkadi waxay aasaasantaa marka qoraalkeeda aasaaska ee diiwaan gelinta uu aqbalo diiwan-hayaha Wasaaradda Ganacsiga uuna diiwan geliyo, aasaseyaashuna codsan dib u dhigid dhaqan gal, islamarkaanaa la hubiyay in magaca shirkadda uusan hore u jirin.

## Qodobka 15aad

### *Wax-ka-beddelka Qoraalka Aasaasidda*

Qoraalka aasaasidda wax ka beddel waa lagu samayn kara waqti kasta iyo ujeeddo kasta, haddana waxaa waajib ah in wax ka beddel lagu sameeyo marka:

1. Wax ka bedelka magaca shirkadda.
2. Qoraalka aasaaska uu ku jiray hadal qalad ah iskuna raacaan saamileyda saddex dalool laba dalool, loona gudbiyo wax ka bedelkaas diiwan hayaha si uu u diiwaan geliyo.

# CUTUBKA 4aad
# MAGACYADA SHIRKADAHA
## Qodobka 16aad
### *Magaca Shirkadda*

1. Magaca shirkadda kuma jiri karo oraah jebinaysa sharci dhaqan gal ka ah dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Magac shirkadeedka, waxa ku jiri kara ereyo la soo gaabiyay sida Inc, Co, Ltd, LLC in kasta oo ay san shardi ahayn in uu noqdo Soomaali ama Ingiriisi, haddii uu ku qoran yahay ereyo Soomaali ama Ingiriisi ah, wuxuu noqon karaa AF-Soomaali, Af Carabi, AF-ingiriisi ama tiro.

## Qodobka 17aad
### *Magac Shirkadeedka Shirkad La Kala Diray*

1. Hadii shirkad la kala diro magaca shirkadda la kala diray waa in lagu daraa ereyga waa la kala diray oo ay la socoto bisha, maalinta iyo sanadka kala diridda shirkadu dhaqan gashay.

## Qodobka18aad
### *Magaca shirkad kacday*

1. Shirkadi waxay kacdaa marka ay gudan weydo dhammaan waajibaadkeeda maaliyadeed iyo heshiisyada hawlaheeda, magaca shirkadda kacday waa in lagu daraa (raaciyaa) ereyga waa kacday oo ay raacayso bisha, maalinta iyo sanadka ay kacday.

## Qodobka 19aad
### *Magac shirkadeed dhigaal ah*

2. Shaqsi kasta waa codsan kara in loo diiwan geliyo magacii uu doono ee shirkadeed si uu si gooni ah ugu isticmaalo una soo gudbinaya codsi qoraal ah Diiwaan-hayaha si loogu diiwaan geliyo. Codsaduhu waa in uu sheegaa magaca iyo cinwaanka, macluumaadka iyo magaca loogu soo dirayo war gelinta iwm.
3. Diiwaan-hayuhu, hadii ay la noqoto in magaca la soo codsaday loo isticmaali karo magac shirkadeed waa diiwan gelinaya magacaas intii (90) sagaashan maalmood ah oo shaqsiguna cusbooneysiin karo hal mar sagaashan maalmood oo kale.
4. Magaca qof loo diiwaan geliyay waa la siin karaa qof kale, balse waa in qofkii horay loog diiwaan geliyay u soo gudbiya siismada diiwan hayaha si loogu diiwaan geliyay shaqsiga kale.
5. Qoraalka aasaaska shirkadda waxaa lagu sheegi karaa in taariikhda dhaqan galka diiwaan gelinta dib loogu dhigo goorta diiwaan hayuhu diiwaan gelinayo magaca

shirkadda la diiwan geliyay, waxa laga soo qaadayaa inuu yahay dhigaal, ilaa qoraalka aasaasku dhaqangal noqdo.

## Qodobka 20aad

### *Qaadashada Magaca Shirkad shisheeye*

1. Magac shirkad shisheeye ee jirta waxaa diiwaan gelin soo codsan karo masuulka maamulkeeda iyo shaqsi fasax ka haysta si waafaqsan shuruudaha ku xusan Qod. **16aad.**
2. Shirkad kasta ee shisheeye waxay dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka diiwan gashan kartaa farac goorta ay hesho fasax ganacsi/shaqo.
3. Magac shirkadeedka shaqsigu doonayo in loogu diwaan geliyo uu yahay magac shirkad Shisheeye, lana isticmaali karin magacaas, waa in ay qaadato magac Shirkadeed kale si ay uga shaqeysato dalka gudihiisa si waafaqsan sharciga.

## Qodobka 21aad

### *Magaca shirkad shisheeye*

1. Haddii shirkad shisheeye oo heysatay qoraal ogolaansho ee ka Diiwaan gashan diiwaanada diiwan-hayaha, balse lagala noqday ogolaanshahii, shirkadaas magaceeda waa in lagu xusaa in ogolaanshihii la gala noqday oo taariikheysan.

# CUTUBKA 5AAD

# SAAMILEY

## Qodobka 22aad

### *Saamiley Cusub*

1. Shirkad jirtay oo dooneyso in saamileydeeda lagu daro samile/saamiley cusub waa lagu dari karaa shirkadda, waxayse ku ansaxeysaa, marka saddex meelood laba dalool 2/3 saamilayaashii hore ee shirkadu ogolaadaan. Haddii saamile uu ku wareejiyo saamigiisa qof iyo in ka badan, waxay noqonayaan saamile/saamilayaal cusub ee shirkadaas.

## Qodobka 23aad

### *Wareejinta Danta Shirkadda*

1. Danta shaqsigu ku leeyahay shirkadda waa hanti shaqsi oo saamiluhu leeyahay ciddii uu doonana waa u wakiilan karaa ama ku wareejin karaa. Haddii aan idmanaha ama loo wareejiyaha laga dhigin saamile ka mid ah shirkadda, wuxuu xaq u yeelanayaa oo keliya in uu helo faa'iidada saamiga iyo wixii kale oo dheef ah. Balse xaq uma laha in uu ka qayb qaato maamulka ganacsiga iyo hawlaha shirkadda.

2. Saamiluhu waa luminaya mulkiyadda saamiga, marka uu shaqsi kale u wareejiyo dantii Saamiga, shaqsiga danta saamiga loo wareejiyay ayaa yeelanayo goorta uu aqbalo, xuquuqdii daneed, awoodihii iyo masuuliyaadkii ayuu la wareegayaa shirkaduna uma raacan karto wareejiyaha saamiga wax masuuliyaad ah.
3. Shaqsiga qeyb saamiga ka mid ah loo idmaday ama loo wareejiyay goorta uu oggolaado, wuxuu xil qaaday dhammaan xuquuqihi iyo waajibaadkii wareejiyaha shirkadda iyo dadka kale ay ku lahaan lahaayeen.

## Qodobka 24aad

### *Deynta Shirkadda iyo Saamile/Saamileyda*

1. Shaqsi deyn ku leh saamile oo codsi cabasho u soo gudbiyay maxkamadda looguna xukumay, maxkamaddu, waxay go'aamin kartaa in laga sii bixiyo danta Saamilaha deynta qabay inta aan la gaarin xukun fulinta una magacaabi kartaa wakiil ka qabta faa'iiadada saamiga saamilaha deynta qabay dheef kasta uu ka heli lahaa Saamiga shirkadda.
2. Wakiilkaasi waa ka bixin karaa amarro, tilmaamo iyo baaritaanno xisaabaadka Saamilaha deynta qabay. Shaqsiga deynta lahaa oo loo fuliyay, wuxuu xaq u yeelanayaa oo kali ah danta saamiga ee loo wareejiyay. Danta Saamile deynta qabay oo maxkamaddu ka qabatay waa la gala soo noqon karaa waqti kasta intii la siiyay ka hor inta aan la gaarin xisaab xirka.
3. Maxkamaddu haddii ay amarto iibinta danta Saamilaha deynta qabay waa la iibsan karaa, waxaana dhici karta in arintaas ay sabab u noqoto kala dirid shirkadda, marka ay oggolaadaan dhammaan saamilaydda aan dantooda Saamile la haysan ama la iibin. Sharcigani kama qaadi karo Saamile faa'iido iyo dan ay siiyeen xeerar kale oo gaar ah.

## Qodobka 25aad

### *Saamilaha Geeriyooda iyo Shirkadda*

1. Haddii qof Saamile ka ah shirkad uu dhinto oo ay maxkamadi u magacawdo daryeele u fuliya danihiisa maamul ama ku adeega awoodihii uu lahaan lahaa saamilaha geeriyooday, daryeelahaas ayaa ku adeegayo dhammaan inta sharcigu ama maxkamaddu u idantay.
2. Haddii Saamiluhu yahay shaqsi sharci oo shirkaddu kacdo ama baaba'do, wakiilka sharci shaqsigii dan ku lahaa saamilahaas ama dhaxalkiisa lahaa ayaa la wareegayo dhamaan awoodahii uu lahaan jiray Saamiluhu.

## Qodobka 26aad

### *Xilka Saamilayda iyo Maamulka*

1. Saamilaha iyo maamulka shirkaddu masuul kama ahan xukun, go'aan ama amar maxkamaddeed oo shirkadda ka dhan ah, deyn iyo waajibaadka masuuliyadeed ee shirkadda saaraan.

## Qodobka 27aad

### *Codaynta Saamileyda*

1. Go'aanada shirkadda waxaa lagu meel mariyaa cod aqlabiyad ah ama oggolaansho mideysan, codbixin shirkadeed kama reebana in lagu saleeyo qiimaha saamiga saamile kastaa leeyahay haddii aysan jirin si ka duwan oo dhammaan saamileydu isla oggolaadeen.
2. Codbixinta waxaa ka mid noqon kara saamile iyo wakiilo joogta ah ama hal mar uu saamile soo dirsaday si uu cod bixinta ugu metalo.

## Qodobka 28aad

### *Dacwad Saamile*

a) Saamiluhu, wuxuu xaq u leeyahay in uu bilaabo dacwad ka dhan ah cid kale ama sii wado, isagoo ka wakiil ah shirkadda si waafaqsan nidaamka iyo sharuucda dalka marka:
 **b)** Saamiluhu waa in shirkadda ka ahaa Saamile waqtiga falka laga cabanayo uu dhacayey.
 **t)** Saamilahana ugu muuqatay in uu xaq u leeyahay metelaada danaha saamilayaasha kale si la mid ahna u taabanayso fulinta xaqa shirkadda.

b) Dacwad oogidda saamile, waxa loola jeedaa dacwadaha madaniga ah oo la xiriira xuquuqda saamileyda shirkadda.

## Qodobka 29aad

### *Dacwad Oogid Saamile*

1. Saamilihu ma bilaabi karo dacwad uu wakiil uga noqonayo shirkadda hadii aan;
 **b)** Codsi u soo gudbin maamulka shirkadda si uu ugu metelo fal dacwo.
 **t)** Inta lagu guda jiro (30) maalmood taariikhda codsigiisa uu u gudbiyay maamulka, marka laga reebo in dhicitaanka soddonka maalmood aysan shardi ahayn marka;
 I. Saamilahana la ogaysiiyay mudada dhicitaanka soddonka maalmood ka hor in codsigiisa shirkadu diiday.

II. Arintu tahay dhacdo shirkadda halis ku ah, haddii la sugo dhicintaanka xiliga sodonka maalmood ah.

## Qodobka 30aad

### *Asbaabta Hakinta Dacwadaha*

1. Si loogu ogolaado in la siiyo shirkadda waqti ku filan oo ay ku baarto eedeymaha dacwo ee laga soo gudbiyay ee ku xusan cabashada loona bilaabay si waafaqsan sharcigaan, Maxkamaddu waa hakinaysaa dacwadda wakiilka looga yahay shirkadda ilaa inta ay ka baaraan degeyso, waxayna siineysaa muddo maxkamaddu u aragto in ay ku habboon tahay.

## Qodobka 31aad

### *Diidmada Dacwada*

1. Dacwad lagu metelayo shirkad aan laga haysan fasax lana bilaabay, Maxkamaddu waa diidi kartaa.
   Sidoo kale maxkamaddu waa diidi kartaa marka ay hesho war gelinta shirkadda oo hubsatay in sii socoshada dacwaddaas ay dani ugu jirin.
2. Danta shirkadda, haddii saamileyda ama maamulku isku afgaran waayaan, maxkamaddu waxay go’aan ku gaaraysaa talada qof khabiir ku ah howshaas oo ka madax bannaan maamuulka iyo saamilayda shirkadda.
3. Maxkamadda ayaa magaacbeysa guddi go’aan ka gaara marka shirkaddu diiddo wakiil dacwadda ku metela, guddigaas waa in ay san dan gaar ahi ugu jirin dacwadda, tahayna mid maangal ah awoodna u leh sii wadid dacwo iyo xalinteeda oo ay siisay maxkamaddu.

## Qodobka 32aad

### *Joojinta Dacwadda*

1. Dacwad la bilaabay lama joojin karo kamana heshiin karan dhinacyadu maxkamadda oo aan ogeyn. Maxkamaddu marka ay go’aansato in talo jeedinta joojinta ama heshiisku ay saamayn wayn ku leedahay saamileyda shirkadda waa in ay war gelisaa dhamaan saamileyda shirkadda oo ay dacwadu saamaynayso si ay u ogaato fikradooda.

## Qodobka 33aad

### *Kharashka Dacwadda*

1. Saamile arrimo macquul ah ku soo dacweeyay isla shirkadii uu saamiga ku lahaa, balse maxkamaddu go’aamiso si u dan ah shirkadda, waxay amri kartaa in shirkaddu u celiso dacwoodaha kharashka macquulka ah ee uu ku galay dacwadda oo ay ku jirto xushmadda qareenada. Hadiise shirkad lagu soo oogo dacwad maxkamaddana ugu muuqatay in ay san ku fadhin sababo macquul ah, waxay amri

kartaa in dacwooduhu u celiyo shirkadda kharajkii ay ku gashay dacwadda si ay isku difaacdo oo ay ku jirto xushmadii qareennada.

## Qodobka 34aad

### *Dhowridda Sirta Diiwaanada iyo Xisaabaadka*

1. Saamile kasta oo shirkadda ka mid ah, wuxuu xaq u leeyahay in uu raaco halbeegyo macquul ah oo saamilayaasha ama maamulayaasha in uu baarto waqti kasta saamileyaasha, maamuleyaashaba iyo diiwanada diiwan hayaha nuqulna ka sameysto. Bixiyaanna kharajka adeegga baarritaankaas, balse waa in marka hore ku soo sheegaa codsigiisa ujeedada iyo danta uu ka leeyahay arintaas, soona codsadaa Xogtaan:

   **b)** Xog buuxda oo run ah kuna saabsan xaalada ganacsi iyo maaliyadeed ee shirkadda oo ay ku jiraan go'aanada iyo hadal qoraalada shirarka iyo nuqulka cashuuraha shirkaddu bixisay sanadkaas.

   **t)** Tixda magacyada saamileyda iyo maamulayaasha shirkadda iyo cinwaanada goobaha ganacsi, deeganada saamileyda, maamuleyaasha iyo cinwaanadooda waraaqaha loogu diro.
2. Maamule kasta xaq uma laha in uu ogaado dhamaan xogta saamileyda iyo maamuleyaasha kale, shirkaddu waxay diiwanadeeda ku keydsan kartaa qaab kale oo aan qoraal ahayn, hadii si fudud loogu bedeli karo qoraal mudo gaaban gudaheed.

# CUTUBKA 6aad

# MAAMULKA

## Qodobka 35aad

### *Magacaabista Maamule*

1. Saamileyda shirkadda ayaa qoraalka aasaaska ama qoraalka diiwaan gelinta shirkadda ayaa dhigayo in shirkaddu madax maamul yeelato. Maamule ama in ka badan oo fuliya howsha shirkadda, waxaase shardi ah in uu ahaado qof caadi ah, da'diisuna ka yareyn 18 sano. Maamuleyaasha, waxaa xilka loogu dhiibi karaa loogana qaadi karaa go'aan aqlabiyad ah oo ay wada gaareen saamileydu.

## Qodobka 36aad

### *Awoodda Maamulka Shirkadda*

1. Go'aanada ku saabsan maamulka shirkadda, waxaa gaara saamileyda ama maamulayaasha si aqlabiyad ah, shirkadda uu maamulo hal maamule awoodiisa, waxa lagu sheega qoraalka aasaaska inta ay gaar siisan tahay.

2. Oggolaanshaha saamile kasta waa qasab in la helo marka, qoraalka aasaaska iyo qoraal kasta oo diiwaan gashan, xeerka iyo howlaha ganacsi ee shirkadda wax laga bedelayo.

## Qodobka 37aad

### *Howl-wadeennada iyo wakiillada*

1. Shirkaddu waxay yeelan kartaa hal ama ka badan oo howl-wadeenno ah iyo wakiilo shaqo oo leh xuquuqda, waajibaadka iyo awoodda ay siisay shirkaddu.
   Howl-wadeenka ama wakiilka shirkadeed waxaa noqon kara qof caadi ah oo aan ka yareyn 18 sano.
   Howl-wadeennada iyo wakiilada waxaa xilka loogu dhiibi/loogana qaadi karaa aqlabiyadda saamileyda shirkadda.
   Xilkooda, xuquuqdooda iyo waajibaadkoodana waxaa lagu kasbadaa oggolaanshaha saamileyda.
2. Howl-wadeennada iyo wakiillada kale waxay qaban karaan howlo kale goorta ay wada oggolaadaan saamileydu hawlo ka baxsan midda caadiga ah ee ganacsi ee shirkadda u diiwaan gashan.

## Qodobka 38aad

### *Waajibaadka Saamilayda iyo Maamuleyaasha*

1. Waajibka shirkaddu ku leedahay saamile kasta waa in uu wada bixiyaa hantida uu ballan qaaday in uu ku darsanayo shirkadda, haddii maamulka shirkaddu gacanta ugu jiro saamileyda iyo maamuulayaasha, shirkadda hantideeda, faaidadeeda ama dheefta ay soo saarto shirkaddu, waxay ka yihiin amaane haye. Lagana filayaa in ay ka dhowrsadan in ay kula beretamaan shirkadda ay maamulayeen hawlo ganacsi kala dirka shirkadda ka hor.
2. Dayacina hantida shirkadda Kana dhowrsadaan falalka taxadir xumo iyo kuwa qaldan oo ku talo gal ah meel ka dhacna ku ah howshii lagu aaminay kana dhalan karto xad gdub sharci.
3. Saamile ama maamule waa ka amaahan karaa shirkadda lacag lana samayn karaa macaamil kale ganacsiga shirkadda. Saamilaha iyo maamulahaba, marka ay timaad arrimo mucaamil, sida dayn iyo macaamil kastana, waxa loola dhaqmayaa labadaba si la mid ah dadka aan Saamilaha ama maamule ka ahayn shirkada iyadoo la raacayo hab dhaqanka khuseeya.

## Qodobka 39aad

### *Reebanaanta Wakiilnimada Saamilayda*

1. Haddii qoraalka aasaaska shirkadda ama qoraalka diiwaan-gelinta shirkadu dhigayo in maamulka shirkadda ay leeyihiin saamilaydu, saamile kasta, wuxuu wakiil uga yahay shirkadda ganacsigeeda. Falkii uu sameeyo saamiluhu isagoo gudanaya hawlihiisa caadiga ah oo ku jiray qoraalada magaca shirkadda ama ganacsi nooca shirkadu qabato, waxa loo qaadanayaa howl shirkadda loo qabanayay. Waxaase ka reeban in saamiluhu wax uu san awood u lahayn ku metelo shirkadda arrin gaar ah isla markaana qofka uu la maacaamilay uu ogyahay in aan Saamiluhu lahayn awooddaas.

## Qodobka 40aad

### *U cawil-celinta iyo Dammaanad Qaadidda*

1. Shirkaddu waa in ay u cawil-celisa shaqsi hore uga ahaa saamile ama maamule lacag uu bixiyay, isagoo gudanaya hawshiisii caadiga ahayd ee ganacsiga shirkadda. Shirkadu waa in ay ka damaanad qaadaa shaqsi hore uga ahaa saamile ama maamule heshiis uu ku galay gudashada hawshisii caadiga ahayd ee shirkadda ama daryeelaya ganacsiga, hantida shirkadda lacagna uga baxday ama masuu'liyad qaaday fulinta xilkii iyo waajibkii ka saarnaa shirkadda.

# CUTUBKA 7aad

# MAALIYADDA

## Qodobka 41aad

### *Qaabka Isku Darsiga*

1. Saamileydu waxay isku darsan karaan lacag, agab iyo adeegyo la qabto oo mid kastaa ballan qaaday ama bixiyay.
2. Shaqsi waa saamile shirkadda wax ku leh ama ka filaaya shirkadda dan Saamile, shirkadana hanti ku darsan ama aan lagu waajibin in uu wax ku darsado shirkadda.
3. Haddii xeer hoosaadka shirkadu uusan si ka duwan u sheegin, shaqsi waa laga dhigi karaa saamile shirkadeed isagoo aan la siinayn dheeftii Saamile ee shirkadda.

## Qodobka 42aad

### *Masuuliyadda Bixinta Raasamaalka Shirkada*

1. Saamileyda waa waajib saaran in ay bixiyaan qadderkii lagu heshiiyay oo mid kastaa ku darsan lahaa shirkadda ama uu celiyo lacag ama agab dhaqaale oo la bixiyay oo horay loo qaybiyay.

Arintaas, waxaa looga baaqsan karaa oo kali ah, marka la helo oggolaansho qoraal oo ay sameeyeen dhammaan saamilayda shirkaddu, Iyadoo aan waxba loogu dhimayn danta iyo xuquuqda shaqsiyaadka daynta ku leh shirkadda.

2. Shirkadu, waxay waajib ugu leedahay cid kasta oo Saamiley ah in uu guto balan qaadkii wax isku darsiga shirkadda, sida lacag, agab iyo adeegyo. Hadii saamiluhu uu san awoodin in uu guto sabab geeri awgeed ama mid dhaqaale xumo, shirkadu, waxay u madax banaan tahay in ay ku darsato ama buuxiso inta ka dhiman qiimaha dhaqaale oo diiwanka ugu qoran.
3. Balan qaadka saamile oo ahaa wax ku darsi shirkad ma noqon karo mid maxkamadi qasab ku fulin karto, hadii uusan ahayn mid qoraal ah oo uu saxiixay Saamiluhu.

## Qodobka 43aad

### *Faa'iido Iyo Khasaare Wadaaga*

1. Faa'iidada iyo khasaaraha shirkadda waxa loo qaybinayaa dhamaan saamilayda iyo xubnaha si isku mid ah, iyadoo qeybintaas lagu salaynayo qiimaha ugu dhigan mid kasta diwaanka shirkada ama ay ku kala darsadeen shirkadda.

## CUTUBKAAAD

## QEYBINTA IYO IS-CASILAADDA

## Qodobka 44aad

### *Qeybinta Hor Dhac ah*

1. Saamileyda waxaa la siin karaa hor dhac ahaan qadder dhaqaale ka hor inta saamiluhu ka bixin ka mid ahaanshada shirkadda ama la kala dirin ama la dhamayn xisaabinta hantida shirkadda.
2. Saamilaha ka mid ah qeybta, wuxuu xaq u yeelanayaa in uu wax ka helo qaybinta ka hor waqtiga dhicitaanka xaaladaha lagu sheegay xeer hoosaadka shirkadda ama si kale ugu heshiiyeen saamilaydu.

## Qodobka 45aad

### *Is-casilaadda Saamilaha*

1. Saamileydu waa u madax bannaan yihiin in ay ka baxaan shirkadda waqtigii ay doonaan, iyagoo siinaya maamulka iyo saamilayda kale ee shirkadda ogaysiis qoraal ah. Waa shardi in ka bixidaas ay san ka hor imaan xeer-hoosaadka dhibaateyna

shirkadda. Haddii kale shirkadu, waxay u raacan kartaa samilaha ka baxay shirkadda dhamaan Kharashyada iyo khasaarihii ka soo gaaray in laga jaro qaddarkii uu ka heli lahaa Saamilaha baxay saamigiisa.

## Qodobka 46aad

### *Xuquuqda Saamilaha Baxaya*

1. Saamilaha baxaya xaq uma laha in uu ka qayb qaato maamulka ganacsi iyo hawlaha shirkadda, wuxuuna xaq u leedahay oo keliya in uu helo saamigiisa iyo faa'iiadada dheefsi ee uu dhalay, dibna loogu celiyaa kharashyadii uu ku galay fulinta howsha shirkadda iyo hantidii uu shirkadda ku darsaday.

## Qodobka 47aad

### *Dib U Qaybin Aan la Samayn Karin*

1. Saamileyda, iyadoo aan laga fiirineyn nooca hantiyeedka ee uu ku darsaday shirkadda, hadii uu ka baxo xaq uma laha in uu codsado ama shirkaddu u celiso nooc hantiyeedkii uu ku darsaday, waxaase loo celinayaa qiimaha lacageed oo ay yeelan karto waqtiga ka bixidda.
   Saamilaha baxay laguma qasbi karo in uu qaato boqoley ka yar boqoleyda hantidiisa uu sharkadda ku darsaday ama ku leeyahay shirkadda.

## Qodobka 48aad

### *Qaybsiga dheefta Saamiga*

1. Marka saamiluhu ka qeyb galo qeybsiga faa'iidada saamiyada shirkadda, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu qaato faaiidadiisa, goorta la bixiyo dhammaan deymaha sannadkaas shirkaddu qorsheysey.

## Qodobka 49aad

### *Faa'iidada Aan La Qaybin Karin*

1. Shirkaddu faa'iido ma qaybin karto, haddii;
   **b)** Dhammaan deymaha iyo xuquuqaha kale ee shirkadda lagu leeyahay aan la wada bixin, marka laga reebo daymaha ku kooban hanti gaar ah oo shirkadu leedahay.
   **t)** Deymaha ku xusan qodobkan faqraddiisa 1aad (b) waa in ay san ka badnaan qiimaha raasumaalka shirkadda, marka laga reebo qiimaha hantida daynta lagu lahaa.
   **j)** Lama qeybin karo faa'iido, iyadoo aan la bixin kharashyadii adeegyada la galay waqtigaas.

**x)** Uu jiro qorshe maaalgelin oo ku talo gal hore loo dejiyey muddadiisiina la gaaray, loona baahan yahay in shirakaddu maalgeliso, maamulkuna ku tala galay xilligii xisaab-xirkii hore.

2. Saamileyaasha qaata qeyb ka mid ah faa'iida aan la qeybi karin kas iyo kama, waxay masuul ka yihiin celinta qaddarkii qeyb ahaan loo siiyay.

# CUTUBKA 9^AAD

# ISKU-BIIRIDDA SHIRKADAHA

## Qodobka 50^aad

### *Isku Biiridda Shirkado*

1. Shirkad iyo in ka badan waa isku biiri karaan si ay u abuuraan shirkad kale si waafaqsan sharcigaan sida uu farayo ee qorshaha isku biiridda.
2. Shirkad iyo in ka badan waa ku biiri karaan shirkad shisheeye oo la mid ah ama ka duwan shirkadaha isku biiraya, si la mid ahna shirkad iyo in ka badan oo shisheeye ah ayaa ku biiri kara shirkad/shirkadaha dalka si waafaqsan sharcigaan sida uu farayo qorshaha isku biiridda.
3. Haddii isku biiridda uusan diideyn xeerka shirkaddu ama sharciga shirkadda shisheeye, markaana shirkadda shisheeye waa in ay waafaqdo dhamaan shuruudaha ku qoran sharciga saamaynaya isku biiridda.

## Qodobka 51^aad

### *Qaabka Isku Biirista*

1. Qaabka isku biirista waa in lagu dhigaa:

   **b)** Magaca shirkadda oo sax ah oo waafaqsan sharciga diiwaangelinta shirkadaha ee dalka.

   **t)** Magaca Shirkadaha isku biirayaa ay abuurayaan oo saxda ah iyo magacyada shirkadihii isku biiray.

   **j)** Shuruudaha isku biiridda oo ay ku jirto hannaanka iyo qaabka ay isku beddeleyaan danaha iyo waajibaadka saamileyda ee mid kasta oo ka mid ah shirkadaha isku biiray iyo kuwa soo haray, lacagaha, agabka kale iyo habka wax qeybsigu sida uu noqonayo.

   **x)** Hadii inta soo hartay ay weli shirkad ahaan u taagan yihiin, badelaadda lagu sameeyo xeerka isku biiridda wuu taabanaya shirkadaha haray hab dhaqankooda.

## Qodobka 52aad

### *Ansixinta Isku Biiridda*

1. Qorshaha isku biiridda waa in loo ansixiyaa:
   **b)** Si waafaqsan qodobada xeerka shirkadda ee la xiriira isku biiridda nooc kasta oo ay tahay, waana inay noqotaa shirkad hore u lahayd qorshe wax ku biirid.
   **t)** Haddii aan la marin hab waafaqsan xeerka shirkadda ama aan lagu xusin xeerkaas isku biirid shirkad ama shirkado, sharciyan cid kuma biiri karto.
   **j)** Haddii aysan jirin qodobbo sharci ah oo aan oggolayn isku biiridda shirakado la tilmaamay noocooda ama qaabkooda.
   **x)** Haddii midkoodna xeerka shirkadda iyo sharcigaba aan si cad u sheegayn meel marinta isku biiridda waa in wax laga bedelaa xeerka shirkadda si loo waafajiyo qaabka qoorshaha isku daridda sharcigu oggol yahay.
   **kh)** Haddii aan midkoodna xeerka shirkadda iyo sharciga uu san si cad u sheegeyn isku biirid ama ansixinta wax ka beddelka xeerka shirkadda, waxaa wada ogolaanaya isku biiridda iyo ansaxintaba dhammaan saamileyda shirkadda.
   **d)** Inta aan la dhaqan gelinin qorshaha isku biiridda, waxaa jiraya talo soo jeedin la xiriirta ee uu qabo sharcigan lagana filayo in ay waafaqaan xeerarkii shirkadaha isku biirayey. Xeerarkaasoo si hordhac ah u sameeyeen maamuleyaasha shirkaduhu una gudbiyeen ama ogaysiiyeen madaxdooda si loo helo kooram u codayn kara ogolaanshaha saamileyda iyo ciddii kale ee dan ku leh shirkadda.

## Qodobka 53aad

### *Dhaqan-galka Isku Biiridda*

1. Marka isku biiridda la ogolaado si waafaqsan sharcigaan qodobka **52aad** oo shirkad ama shirkadahu ay yihiin kuwo qoraalkooda aasaaska iyo midkooda diiwaan-gelinta ee ka diiwaan-gashan Diwaan-hayaha. Shirkadda/ha soo haray waa in ay u gudbiyaan Diiwaan-hayaha si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan ee isku biiriddu uu dhigayey:
   **b)** Magaca shirkadda cusub ee saxda ah iyo Shirkadaha isku biiray, cinwaanka xarunteeda dhexe, xeerkooda gaarka ah ee lagu aasaasay iyo qaab dhismeedka Shirkadda.
   **t)** Marka shirkadda hartay lahayn magac, magaca saxda ah ee shirkadda hartay, cinwaanka xarunteeda dheexe, xeerka lagu aasaasay iyo qaab dhismeedka Shirkadda.

**j)** Shirkadaha isku biiray iyo is bedelka shirkada haray.
**x)** Xiriirada isku biiridda kale oo ay keentay isku biiridu shirkadda cusub iyo kuwii haray.

2. Hadii shirkada/ha haray xeerkoodu dhigayo qorshaha isku biiridda waa in wax laga bedelo qoraaladi shirkadaha haray lagu diiwaan geliyay is bedeladaana loo soo gudbiyaa diiwaan-hayaha si uu mar kale u diwaan geliyo qoraalka wax ka bedelka.
3. Marka la ogolaado ka dib Shirkadda/ha isku biiriya kuwaas oo aan lahayn qoraal aasaas oo u diiwaan gashana, shirkada/ha haray waa in ay u gudbiyaan Diiwaan-hayaha si loogu diwaan geliyo is bedelkaas.
   **b)** Magaca saxda ah ee Shirkadaha isku biiray, xaruntooda dhexe, shuruucdooda iyo qaab dhismeedkooda gaarka ah ee lagu aasaasay Shirkadda.
   **t)** Magac shirkadeedka ee shirkadaha haray iyo cinwaanka xaruntooda dhexe.
   **j)** Shirkad kasta oo wax ku biirtay oo isku bedeshay shirkad hartay.
   **x)** Arrin kasta oo la xiriirta isku biiridda shirkadda soo hartay ee go'aansatay in ay wax ku biirto.
4. Haddii qorshaha isku biiridu dhigayo in wax ka bedel lagu sameeyo qoraal loo diiwaan geliyay shirkadda soo hartay waa in ay keentaa qoraal wax ka bedel oo ku haboon ama mid kale ee sheegaya wax ka bedelka loona gudbiyaa Diiwaan-hayaha, si uu u diiwaan geliyo si waafaqsan sharcigaan.
5. Isku biiriddu waxay dhaqan gal noqonaysaa sida ku xusan sharcigaan, haddii sharcigu uu san sheegin taariikhda dhaqan galka, isku biiridda, waxay dhaqan gelaysaa waqtiga iyo taariikhda qoraalka isku biiriddu uu dhaqan galo si waafaqsan qodobada sharcigan.

## Qodobka 54aad

### *Raadka isku Biiridda*

1. Isku biiriddu marka ay dhaqan gasho;
   **b)** Shirkadaha isku biiray mid kasta oo ka mid ah, waxay ka mid noqonaysaa shirkadda cusub, jiritaankoodii gaarka ahaana waa dhamaanayaa. Si la mid ahna, waxaa dhamaanaya dhammaan xuquuqaha, mudnaanaha gaarka ah iyo hantidii Shirkadahaas wax ku biiray, awoodaha iyo waajibaadka mid kasta lahayd ee Shirkadaha isku biiray, waxaa sharci ahaan yeelanaya shirkadda cusub. Saamileydii shirkaduhuna waxay si toos ah uga mid noqonayaan mulkiilayaasha shirkadda cusub. Isku biiriddaas wax u dhimi meyso mulkiyaddii saamileyda iyo xuquuqaha daynlayaasha. Marka laga reebo daymaha lagu leeyahay hantida gaar ahaaneed ee shirkad kasta oo ka mid ahayd kuwa isku tegay.
   **t)** Shirkadaha isku biiray, mid kasta waxay leedahay hantidii ay ku darsatay shirkadda cusub oo ka dhalatay isku biiridda. Isku biiriddu waxba ma yeelayso hantidaas si kasto oo looga hayo. Dhammaan waajibaadkii saarnaa mid kasta oo shirkadaha isku biiray ka mid ah, waxaa la wareegaya shirkadda cusub,

sharciyanna ka mid dhigeysa waajibaadkeeda, si buuxdana loogu fulin karo sharciyan. waayo isku biiriddu way ka duwan tahay wareejin iyo idmasho.

**j)** Mulkiile uu waajib saarnaa ka hor isku biiridda oo shirkadiisina ku biirtay shirkad kale, waajibkaas waa saarnaanayaa in kasto oo shirkadiisii ku biirtay mid kale, hadii aan heshiis ka hadlaya waajibkaas uu san dhigeyn sidaas wax ka duwan.

**x)** Haddii sidaas si ka duwan lagu sheegin xeerka shirkadda ama sharci waajibinayn, shirkadaha wax ku biiraya loogama baahna in lagu sameeyo dhamayn iyo xisaabin ganacsigooda ama gudashada waajib qaybin hanti. Isku biiriddana looma qaadan karo in ay la mid tahay kala dirid iyo lacagaynta hantida shirkadda wax ku biirtay.

**kh)** Haddii aan sidaas si ka duwan lagu sheegin xeerka shirkadda ama sharci kale oo aan waajibinayn, wixii loo siiyo lacag ahaan ama shay ahaan mulkiilayaasha shirkadaha isku biiraya si waafaqsan qorshaha isku biiridda ma ahan qeybsi faa'iido, liiltir shirkadeed iyo qeybsi nooc kale oo ku saleysan xuquuq qeybsi ku dhisan heshiis mudnaan gaar ah leh.

## Qodobka 55aad

### *Shirkad shisheeye oo ka hartay isku biiridda*

1. Hadii ay isku biirayaan shirkado hal iyo ka badan ee dalka iyo Shirkado shisheeye, shirkada/ha shisheeye oo shirkadda shisheeye tahay mid cusub, shirkadaas shisheeye waa;

   **b)** In ay magacaabataa qof u qabto howlaha dhageysi ee lagu fulinayo waajib ama xaquuq mulkiilayaasha laga cod batay ee shirkad wax ku biirtay. Si la mid ah dhageysiga ku salaysan dacwad ka dhalatay arin la xiriirta shirkad dhinac ka ah isku biiridda.

   **t)** In ay sida ugu dhaqsaha badan loo siiyaa mulkiilayaasha laga cod batay ee shirkad dhinac ka ah isku biirid qadarkii sharcigu xaqa u siinayo.

   **j)** In ay raacdaa dhamaan shuruucda dhaqan galka ka ah dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaliya ee la xirira hab dhaqanka ganacsiga dalka. Shirkad shisheeye ee doonaya in ay ka ganacsadaan dalka Soomaliya waa in ay u hogaan samaan dhaamaan shuruucda dalka dhaqan galka ka ah.

## Qodobka 56aad

### *Xuquuqda Saamilayda laga cod batay*

1. Saamileyda laga cod batay waxay xaq u yeelanayaan dhamaan xuquuqda la xiriirta isku biiridaas iyo inta sharcigu uu si cad u diidayo mooyee si waafaqsan cutubkan.

2. Hadii aan sidaas si ka duwan lagu sheegin qorshaha isku biiridda, Shirkadda uu ku biiray ee kale kuna jirta ganacsi ay xuquuq ku leeyihiin mulkiilayaasha laga cod batay, waxaa lagu dhaqayaa nidaamka isku biiridda. Mulkiilaha shirkada wax ku biirtay oo ogolaaday ama diiday ee aan helin xuquuqdii codeed in kasta oo laga cod batay, wuxuu ka noqonayaa saamile shirkadda cusub ee soo hartay, waxana qabanayo qoraalka hawl gelinta shirkada cussub.

## CUTUBKA 10aad
## KALA DIRIDDA
## KALA DIRIDDA IKHTIYAARIGA AH
## Qodobka 57aad
### *Waqtiga Kala Diridda*

1. Shirkad waxaa lagu kala diri karaa:

   **b)** Haddii ay ku heshiiyaan in la kala diro shirkadda dhammaan Saamileydu.

   **t)** Marka la gaaro waqtiga ama xaalad lagu sheegay xeer-hoosaadkooda.

   **j)** Haddii ay shirkaddu noqoto saamiley la'aan ka hor:

      I. Maalinta bilowga ilaa sagaashan (90) beri ka dib oo shirkadu noqoto saamiley la'aan intii muddadaas.
      II. Taariikhda qoraalka kala diridda shirkaddu waa dhaqan galayaa si waafaqsan qodobka **88aad** ee sharcigaan.

## Qodobka 58aad
### *Wargelinta Qoraalka kala diridda*

1. Marka la kala dirayo shirkad waa in ay ku war gelisaa diiwaan-hayaha si loo diwaan gelinayo hab waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigaan, qoraalka kala diridda shirkadda oo sheegaya:
   **b)** Magaca shirkadda waddaniga ah.

   **t)** Cinwaanka xarunteeda dhexe ee shirkadda.

   **j)** In shirkadaas lagu kala diray si waafaqsan qodobka **59 aad.**

2. Sida ku cad qodobbada **43aad** iyo **57aad**, qofka aan ahayn maamule ama Saamile, waxa laga soo qaadayaa in uu ogyahay kala diridda shirkadda ka hor;

**b)** Maalinta sagashanaad (90) ka dib oo qoraalka kala diridda shirkadda la geliyo diiwaannada Diwaan-hayaha ama;

**t)** Taariikhda saxda ah ee uu qofkaasi ogaaday kala diridda shirkadda.

## Qodobka 59aad

### *Raadka Kala Diridda*

1. Shirkad la kala diray waxay usii jiri kartaa shirkad ahaan, balse wax howl/shaqo ah ma qaban karto oo aan ka ahayn howl mahuraan ah sida dhammeynta, xisaabinta iyo lacageynta howlaha ganacsigeeda oo ay ka mid tahay;
   - **b)** In ay urursato hantideedii.
   - **t)** In ay xal u hesho agabkeeda aan loo qeybin karin saamilayda.
   - **j)** In ay iska guddo ama ay qaaddo tallaabooyin ay iskaga gudayso masuuliyad qaameedka saaran.
   - **x)** In ay u qaybiso hantideeda harsan saamileyda;
   - **kh)** In ay samayso ficil kasta oo lama huraan u ah dhammeynta, xisaabinta iyo lacagaynta hantideeda.
2. Shirkadda la kala diray way joojin kartaa dacwadaha ka dhanka ah, iyadoo raacaysa qodobbada **70aad** iyo **71aad.**

## Qodobka 60aad

### *Xisaabinta iyo Dhammeynta Shirkadda*

1. Shirkadda marka la kala diro ka dib ee aanu maamule jirin, saamileyda ayaa sameyn karta inay dhammeeyaan ama xisaabiyaan hantida ganacsiga shirkadda. Balse marka codsi uu soo gudbiyo saamile, wakiilka sharci ee saamile ama cid saamile igmatay ama maxkamad awood u leh ugu wareejisay asbaabo sax ah, waxay amri kartaa dhammeynta iyo xisaabinta garsoore hubiya.
2. Wakiilka sharciga ah ee idmadaha ama wareejiyaha la idmaday ee uu u wareejiyey saamilihii u dambeeyey, wuu samayn karaa dhammeynta iyo xisaabinta ganacsiga shirkadda haddii shirkadda la kala diray.

## Qodobka 61aad

### *Maamulaha iyo Saamilaha Xilliga Kala Diridda*

1. Iyadoo la raacayo qodobka **59aad** ee sharcigan, shirkaddu waxay mas'uul ka noqonaysaa ficillada uu sameeyo maamulaha ama saamiluhu ka dib gooorta shirkadda la kala diro. Saamilihu wuxuu soo geli karaa, haddii qoraalka aasaasku

ama ka diiwaan-gelinta shirkaddu sheego in maamulka shirkadda ay madax ka yihiin saamileydu, ficiladaas oo ah;

**b)** Mid ku habboon dhammeynta iyo xisaabinta ganacsiga shirkadda.

**t)** Ugu adeegidda shirkadda si waafaqsan qodobka **39aad** ka hor kala diridda shirkadda goorta shaqsi kale oo lala macaamilay aanu ogayn kala diridda shirkadda.

## KALA DIRIDDA GARSOORKA

## Qodobka 62aad

### *Garsoorka iyo Kala Diridda*

1. Shirkad waxaa lagu kala diri karaa dacwad ay ku soo oogtay Xeer-ilaalinta goorta;
   **b)** Shirakadda laga helo qoraalkeeda aasaaska ama kii diiwaan gelinta khiyaano ama;
   **t)** Shirkadda lagu helo in ay ku kacdo xad gudubyo shuruucda dalka iyo xeerka shirkadaha, markaas shirkadda, waxaa lagu kala dirayaa dacwadda xeer ilaaliyuhu ku soo oogay.
2. Shirkad waxa lagu kala diri karaa oo kale in saamileydu ku soo oogto maamule shirkadda ka tirsan dacwad run ah ama ay cadaato in aysan macquul ahayn in shirkadu sii jirto ganacsina dalka gudahiisa ka sii wado si waafaqsan xeer hoosaadka shirkadda.
3. Shirkad, waxa lagu kala diri karaa dacwad uu soo oogo qof amaah ku leh shirkadda goorta ay dhabowdo;
   **b)** In sheegashada daynluhu ay ku qoran tahay xukun fulin oo ka suuro geli waayay shirkadda sabab kicid awgeed.
   **t)** Haddii shirkadu kacdo jirtana qoraal qiraal ah jiritaanka deyntaas.
4. Hadii shirkadda lagu kala diray sifo sharci ah, sida ku qeexan faqradda 1aad ee qodobkan.
   **b)** Shirkaddu waxay soo gudbin kartaa codsiga dhammeynta, xisaabinta iyo lacageynta hawlaha ganacsigeeda, iyadoo garsooruhu kormeerayo/hubinayo si waafaqsan qodobka **61aad** ee sharcigan.
   **t)** Xeer ilaalinta, Saamile, maamule ama deynlaha midkood wuxuu soo oogi karaa dacwadda dhammeynta, xisaabinta iyo lacageynta hawlaha ganacsiga ee shirkadda, iyadoo garsooruhu kormeerayo si waafaqsan sharcigan qodobkiisa **61aad** marka la helo sababaha loo dhigay qofkaas ee ku xusan qodobkan farqadaha 1aad- 3aad.
   **j)** Sida ku xusan qodobbada **64aad - 66aad,** dacwad garsoor oo lagu soo oogay shirkadda si loo kala diro waa in ay noqoto mid waafaqsan qodobkan faqraddiisa 4aad. Go'aanka kala diridda shirkaddu waa in uu ahaado mid u qaabeysan sidii xeer kala dirid oo leh amar maxkamadeed oo sababeysan oo

dood maray waafaqsana qodobkan farqadiisa 4aad. Isla markaana amraya in ganacsiga iyo hawlaha shirkadda lagu sameeyo dhammeyn, xisaabinta iyo lacagaynta ganacsigeeda garsooruhuna kormeerayo.

## Qodobka 63aad

### *Garsoorka Lagu Kala Dirayo*

1. Dacwadda kala diridda shirkad ee ay soo oogtay Xeer ilaalinta waxaa loo gudbinaya Maxkamadda awoodda u leh ee Dowladda Xubinta ka ah Dowladda Federaalka oo ay ku taallo xurunta dhexe ee shirkadda, haddii xarunta dhexe ee shirkadda ay ku taallo Gobolka Banaadir, dacwadda waxaa qaadaysa Maxkamadda Gobolka Banaadir.
2. Dacwadda kala diridda shirkadda ee uu soo oogo dhinaca ku xusan qodobka **65aad,** waxa loo gudbinayaa Maxkamadda Gobolka ay ku taal xarunta dhexe ee shirkaddu**.**
3. Haddii shirkaddu aysan Dalka ku lahayn xarun dhexe, waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda Gobolka Banaadir.
4. Qasab ma aha in maamuleyaasha iyo saamileyda la horgeeyo maxkamad sabab dacwad kala dirid shirkadeed, haddii aan iyaga shaqsi ahaan dacwadda loogu soo oogin.
5. Maxkamadda dacwad kala dirid shirkad la hor geeyay, waxey soo saari kartaa go'aan hordhac ah oo lagu magacaabayo guddoomiye ama ilaaliye awood leh iyo waajibaad ay fartay maxkamaddu, si la mid ah u qaadi karo tallaabooyinka lagu sugayo waajibaadka la saaray kana mid yihiin in shirkaddu sii wadato howsheeda ganacsi inta laga gaarayo dhammaadka dhageysiga dacwadda.

## Qodobka 64aad

### *Guddoomiye/Ilaaliye*

1. Maxkamadda qaadaysa dacwadda lagu kala dirayo shirkad, waxay magacaabi kartaa qof gudoomiye ah ama in ka badan si loo dhammeeyo, lacageeyo iyo qof ilaaliye ah ama ka badan si uu u maamulo ganacsiga iyo hawlaha shirkadda. Maxkamaddu ka hor inta ay san magaacibin guddoomiyaha ama ilaaliyaha waa in ay qabataa dhegaysi hordhac ah, ka dibna gaarsiiso dhammaan dhinacyada dacwadu quseyso ama dan ku leh shirkadda. Maxkamadda u magacaabaysa gudoomiyaha ama ilaaliyaha oo keliya ayaa awood u leh shirkadda dhammaan hantideeda meel kasta oo ay hantida shirkadu jirto.

2. Maxkamadu waxey u magacaabi kartaa shaqsi caadi ah ama shirkad waddani ah gudoomiye ama ilaaliye. Maxkamaddu waxay awood u leedahay in ay ka dhigto guddoomiyaha ama ilaaliyaha qaddar rahan ah oo Maxkamaddu xaddiddo.
3. Maxkamaddu waa in ay ku qeexdo awoodaha iyo waajibaadka guddoomiyaha ama ilaaliyaha xukunka ay ku magacaabayso, iyadoo wax ka bedeli karta awoodahaas oo ay ka mid yihiin;
   **b)** In guddoomiyaha:
      I. Hadii ay ogolaato maxkamaddu uu si furan ama dahsoon u iibin karo hantida shirkadda qayb ama dhammaan meel kasta oo ay taal.
      II. Isagoo adeegsanaya magaca gudoomiyaha shirkadda in uu uga furi karo maxkamad dacwad ku meteli karana dacwad lid ku ah shirkadda.
   **t)** Ilaaliyuhu isagoo ka haysta ogolaanshaha maamuleyaasha shirkadda, marka ay qorayaan qoraalada aasaaska iyo midka diiwaan gelinta shirkadda. Haddii shirkadda ay maamulayaan maamuleyaal, waxa ay adeegsan karaan dhammaan awoodaha shirkadda, isagoo u adeegsanaya arimaha maan galka ah ee ugu wanaagsan oo loo maareeyn karo ilaalinta danta saamilayda, daynlayaasha, maamuleyaasha iyo hawlaha shirkadda.
4. Maxkamaddu, waxay guddoomiyaha ka dhigi kartaa ilaaliye, ilaaliyahana guddoomiye, hadii ay sidaas u aragto maxkamaddu in danta shirkadda, saamilayda iyo deynlayaasha ay ku jirto.
5. Maxkamadu, waxay hadba inta ay socoto hawsha guddoomiyuhu ama ilaaliyaha amri kartaa in loo magdhawo lana bixiyo kharashyada uu galo ama geli doono iyo xushmadda qareenka difaacaya hantida shirkadda ama marka la iibinayo.

## Qodobka 65aad

### *Go'aanka Kala Diridda*

1. Haddii dacwad maxkamadeed oo kala dirid ah lagu soo oogay shirkad, dhegaysi ka dibna maxkamadda u caddaato in mid ama ka badan sababaha ku dhigan qodobkan ay jiraan, waxay soo saari kartaa go'aan lagu kala dirayo shirkadda. Iyadoo xuseysa taariikhda dhaqan galka kala diridda shirkadda, kaaliyaha maxkamadduna waa in uu gaarsiiyo nuqul go'aanka diiwaan hayaha shirkadaha si uu u diiwaan geliyo si waafaqsan cutubka 14aad ee sharcigaan.
2. Maxkamaddu go'aanka kala diridda marka ay gaarto ka dib, waxay amraysaa in la sameeyo dhammeynta, xisaabinta iyo lacageynta hawlaha ganacsi ee shirkadda si waafaqsan qodobka **62aad,** waana in la wargeliyaa dacwoodayaasha si waafaqsan qodobada **71aad** iyo **72aad.**
3. Go'aanka maxkamadda, waxaa laga qaadan karaa rafcaan ama dib u eegis goorta la helo xogo cusub oo maxkamada doodaheedii ka maqnaa.

## Qodobka 66aad

### *Kala Diridda Wakhtigeedu Dhacay*

1. Shirkaddu si toos ah ayay u kala dirmaysaa goorta wakhtigeedu dhaco ama muddadii loo qabtay dhamaato ee ku xusan qoraalkeeda aasaaska ama midkeeda diiwaan-gelinta.

## Qodobka 67aad

### *Kala Diridda Shirkad Isbixin Weydey ama Sharcigana U Hoggaansami Weydey*

1. Haddii shirkadi bixin weydo deymaheeda xal kalana u weydo muddo saddex sano ama ka badan, maamule kasta oo shirkadda ka tirsan ayaa kala diri kara shirkadda. Isagoo u soo gudbinaya diiwan-hayaha xaaladda dhaqaale ee shirkadda si uu ugu diiwaan-geliyo hab waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan sida uu farayo.
   - **b)** Magaca shirkadda isbixin weydey ama Sharcigan u hoggaansami weydey.
   - **t)** Cinwaanka xarunteeda dhexe ee shirkadda.
   - **j)** In shirkaddu tahay mid isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey oo ku guul darraysatay in ay bixiso deymihii lagu lahaa mudo saddex sano iyo ka badan.
   - **x)** In ugu yaraan soddon (30) maalmood ka hor ay ogaysiin qoraal ah ku gaarsiisay qorshaheeda kala diridda diiwan-hayaha si uu ugu diiwaan-geliyo, kuna war geliyaan dhammaan mulkiilayaasha iyo ciddii kale ee xuquuq ku leh si waafaqsan sharcigaan iyo Xeer hoosaadka shirkada, si ay uga hor tagaan kala diridda shirkadda.
2. Shirkad isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey, waxay kala dirmaysaa taariikhda ay dhaqan-galka noqonto kala diriddu ee ku xusan qoraalkeeda kala diridda.

## Qodobka 68aad

### *Kala Diridda Shirkad*

1. Shirkad lagu kala diray si waafaqsan qodobbada **68aad** ama **69aad** waa sii jiri karta, balse ma qaban karto wax ganacsi iyo howlo kale ah oo aan ahayn fududeynta dhammeynta iyo kala diridda, lacageynta hawlaha ganacsigeeda iyo wargelinta la siinayo inta ay quseyso dacwadu si waafaqsan sharicga.

## Qodobka 69aad
### *Dacwad Joojinta*

1. Shirkadaha la kala diray, waxay joojin karaan dacwadaha ka dhanka ah, iyagoo raacaya habka ku dhigan qodobkan.
2. Shirkad la kala diray, waxay u gudbin kartaa wargelin qoraal ah shakhsiyaadka danta ku leh si waafaqsan qodobkan faqradiisa 1aad wakhti kasta. Goorta kala diridda shirkaddu dhaqan gasho, waa in lagu wargeliyaa sida ugu dhakhsaha badan si aan loogu gudbin tallaabada xigta. Dacwad kasta oo shaqsi u qabo shirkadda la kala diray in ay ku dhaceyso waqtigeedii, hadii aan la bilaabin xilliga loogu talo galay ee ku xusan war gelinta. Shirkadda la kala diray waa go'aansan kartaa in lagu daro warbixinteeda xog jirta ee la xiriirta hab raac sahlaya dacwada ka dhanka ah shirkadda la kala diray. Marka laga reebo in aan waajibaad la saarin iyo culeys dadka dacweynaya shirkadda la kala diray sida fasiraad sharci aan jirin.
3. Haddii sidaas si ka dhakhso badan uu san sharcigu sheegin ama xaddidin, dacwadda shirkad la kala direy shaqsiga ka dhan ah, laguma eedeyn karo gaarsiinta wargelinta kala diridda ku xusan faqradda 2aad mana la aqbali karo dacwad aan la bilaabin xiligii loo qabtay ee ku xusan wargelinta.
4. Qodobkan dhexdiisa laguma dacwoon karo masuuliyad aan la hubin dhacdadeeda mustaqbal ama ku salaysan dhacdo dhacday ka dib dhaqan galka kala diridda. Qodobkani waa oggol yahay dacwo dhex dhexaadin oo lagu gaari karo heshiis la fulin karo oo ka dhexeeya shirkadda la kala direy iyo shaqsi kale.

## Qodobka 70aad
### *Joojinta dacwad Faafin Ka Dib*

1. Shirkad la kala diray, waxay faafin kartaa war gelinno kala dirid kuna codsan karta shaqsigii dacwad u qabo shirkadda la kala diray in uu soo gudbiyo qoraal waafaqsan nuxurka war gelinta.
2. War gelinta ku xusan qodobkaan faqradiisa 1aadwaa in lagu daabaco hal mar wargeyska iyo faafinta rasmiga ah ee wararka loogu faafiyo deegaanka ay ku taal xarunta dhexe ee shirkadda la ka la diray.
3. Faafinta waa in lagu sheegaa, haddii aan sharcigu si kale oo ka dhaqsi badan fareyn in dacwadda loo qabo shirkadda la kala diray lagu soo oogo shan (5) sano gudohood oo ka bilaabata waqtiga wargelinta la faafiyay ama lagu daabacay war faafinta.
   **b)** Wargelintaas, waxa ku jiri kara xogo kale oo shirkadda la kala diray, hadii ay go'aansato in lagu daro warbixinnada kala diridda ahna xog la xiriirta hab raac sahlaya furashada dacwadda ka dhanka ah shirkadda la kala diray, balse aan dhalinayn waajibaad aan sharciguba sheegin.

- **t)** Sida ku xusan faqradda 3aad ee Qodobkaan, waxaa la bilaabi karaa dacwad kasta ee lid ku ah shirkad la kala diray shan sano gudahood, ka bilaabata maalinta wargelinta kala diridda lagu daabacay warfaafinta.
- **j)** Waqtigaas ka dib qofna ma soo dacweyn karo shirkadda la kala diray. Intaas waxaa ka reebban marka ay dhinacyadu wada oggol yihiin in la joojiyo si waafaqsan qodobka **71aad** iyo dacwadaha aysan dhanka ka ahayn Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed oo u kala baxa mid socota iyo mid taagan ee la xiriirta lacageynta hantida shirkadda, kuna saleysan heshiis sharciyeysan.

4. Qodobkan lagu dhaqi maayo dacwadda wargelinta ay gudbisay shirkad la kala diray si waafaqsan qodobka **71aad.**

## Qodobka 71aad

### *Fulinta Dacwadaha Shirkad La Kala Diray*

1. Shirkad la kala diray dacwad waa lagu oogi karaa si waafaqsan qodobbada **71aad** iyo **72aad:**
   - **b)** Marka shirkadda la kala diray aan hantideeda la qaybin.
   - **t)** Haddii hantida lagu qiimeeyay deyn-bax lacageed mulkiileyaasha shirkadda la kala diray, waxaa laga jarayaa wadarta guud ee deynta marka ay isku dhamadaan qiimaha wadarta guud ee daynta iyo hantida shirkadda.
   - **j)** Haddii mulkiileyaashu horey u kala qeybsadeen, waxaa looga baahan yahay in ay soo celiyaan qiimaha qaybta ay ka heleen hantida si loogu deyn baxo loogana soo ururiyo dhamaan mulkiilayaasha.
   - **x)** Ururintaasna waa in ay ahaato mid ku saleysan heerka xuquuq iyo daneed ee uu mulkiilihu ka helay qeybsiga lacageed ee hantida shirkadda la kala diray.

# CUTUBKA 11AAD

# WAR-BIXIN SANNADEEDKA

## Qodobka 72aad

### *Warbixin sanadeedka*

1. Warbixin kasta ee shirkad shisheeye waa in loo gudbiyaa diiwaan hayaha isagoo u diiwaan gelinayo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan. Warbixintaasna waa in ay noqotaa warbixin sanadeed ay ku xusantahay magaca shirkadda iyo cinwaanka xarunteeda dhexe faallana ka bixinaysa waxqabadka ay fulisay, iyadoo u kala qeybinaysa hannaanka ku xusan xeer nidaamiyaha wasiirka wasaaradda ganacsiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Shirkadda shisheeye waa in ay u soo gudbisaa diiwaan hayaha warbixin sanadeedkeeda Sanad walba maaalinta ku xigta sanad guuradii koowaad ee la diiwaan geliyay.
3. Warbixinnaduna waa in ay noqdaan dhaqangal, shirkadduna tahay mid dib u soo ceshata ama bixisa daymaha lagu leeyahay ugu dambayn maalinta dhamaadka bisha labaad ee ugu dambaysa sanad guuradeeda 1aad ee dib u soo ceshiga ama dawaynta dhaqan xumo dhacday, markaas ka dib warbixin sanadeedka shirkad kasta waa in loo soo gudbiyaa diiwaan hayaha sanad kasta.
4. Xogta Warbixin sanadeedku waa in ay noqotaa mid cusub oo ka hadlaysa taariikhda warbixin sanadeedka laga soo gudbay diiwaan hayuhuna uu hayo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan. Warbixin sanadeedka laguma sheegi karo taariikhda dhaqan galka oo dib u dhacsan.
5. Shirkad kasta oo ku guuldarreysata gudbinta warbixin ama diidda in ay u soo gudbiso diiwaan hayaha si loo diiwaan geliyo ama is diiwaan geli wayda ka hor taariikhda ku tilmaaman qodobkan faqraddiisa 2aad si aysan u bixin khidmadda adeegga waxay mutaysanaysa ciqaabta ku xusan qodobka **87aad** mana noqonayso shirkad sii jiri karta.

## CUTUBKA 12AAD
## FAL SHARCI DARRO EE SHIRKADI GELI KARTO
## Qodobka73aad

Sababaha dhaqan xumo shirkadeed keeni kara;

1. Shirkad waddani ah, waxay ku kici kartaa dhaqan xumada ku xusan qodobka **75aad** ee sharcigaan, hadii aysan;
   **b)** Bixin khidmadda adeegga ama ciqaab uu saaray sharcigan oo ku waajibtay.
   **t)** Waafiqin qodobka **11aad** ee sharcigaan sida uu u farayo Shirkadaha.
2. Shirkad shisheeye waxay noqon kartaa mid ku sifowday dhaqan xumada ku xusan qodobka **75aad** ee sharcigaan:
   **b)** Haddii aysan bixin khidmadda adeegga ama ciqaabaha ganaax oo sharcigani saaray.
   **t)** Haddii ay diido gudbinta warbixin sanadeedka uu farayo sharcigan qodobkiisa **12aad.**
   **j)** Haddii aysan u keenin diiwaan-hayaha si uu ugu diiwaan-geliyo si waafaqsan sharcigan qodobka **13aad** isbeddelka qoraallada iyo ogolaanshahooda mahuraanka ah.

3. Diiwaan-hayuhu hadduu ku helo xog sugan oo dhab ah ama lagu aasaasay shirkado waddani ah iyo kuwa shisheeye una caddaatay inaysan wax dan qaran ah ku jirin jiritaankeeda iyo shirkad kale ku biiriddeeda.

## Qodobka 74aad

### *Cawaaqibka Fal Sharci Darro*

1. Haddii diiwaan-hayaha u caddaato in mid ama ka badan sababaha ku dhigan sharcigan qodobkiisa **75aad** oo shirkaddu ku sifowdo dhaqan xumo, shirkadduna aanay sixin lixdan (60) cisho gudohood sababahaas, kana bixin cudurdaar maangal ah oo lagu qanci karo, diiwaan-hayaha waxaa u bannaan in uu go'aan ka qaato si waafaqsan Sharciga.
2. Shirkad waddani iyo mid shisheeye, waxay noqonayaan kuwo ku sifooba dhaqan xumo, haddii diiwaan-hayuhu u arko ama u caddaato in ay ku guul darraysteen soo gudbinta diiwaan-gelinta qoraalada shirkadaha iyo ogolaansho siinta Shirkad Shisheeye, si loogu diiwaan geliyo hab waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, soddon (30) maalmood gudohood oo ka bilaabanta taariikhda diiwaan-gelinta sharcigani sheegay ay dhaqan gasho.

## Qodobka 75aad

### *Saamaynta Fal Sharci Darro*

1. Shirkad isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey in ay ka dacwooto maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya looma ogola si ay u urursato daymo ka maqan ama waajibaad howleed ka fuliso dalka ilaa ay ka saxdo dhaqan xumada si waafaqsan sharcigan qod. **76aad** faqrooyinkiisa 1aa-2aad.
2. Maxkamadaha dalku waa sii wadi karaan dacwad lid ku ah shirkadaha shisheeye iyo kuwa waddaniga ah ilaa ay go'aan kama dambeys ah uga gaarto in shirkaddu tahay mid isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey. Haddii maxkamadu go'aamiso in shirkaduhu ay yihiin kuwo isbixin waayay ama sharciga u hoggaansami waayay, maxkamadu waa hakin kartaa go'aankeeda in mudo ah oo shirkadaha ay ka saxdo in ay u hoggaansamaan sharciga si waafaqsan qod.**76aad** ee sharcigan. Dacwad ka socota maxkamad Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya ku taal oo shirkadaasi dhinac ka tahay lagama ogolaan karo in ay shirkaddu ku dafirto u hogaansan la'aantii sharciga, balse waa hakin kartaa dacwad inta shirkaddu ka soo waafaqeyso qod.**76aad** ee sharcigan.
3. Haddii shirkad isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey ay saxdo falkeedaas u hogaansan la'aanta, waa sii jiri kartaa shirkaddu, iyadoo aan lagu ciqaabeyn/fiirineyn u hogaansan la'aantii hore.

4. Shirkad isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey waa la kala diri karaa mar kasta iyo hanaan kasta oo uu dhigay ama ogol yahay xeerka shirakaddu, sharciyanna ku guuleysan weyday in ay saxdo u hogaansan la'aantii, mudo sadex sano iyo ka badan waa la kala diri kara si waafaqsan sharcigan qod. **67aad.**

## Qodobka 76aad

### *Sixidda Falka Sharci daro ee Shirkadda*

1. Waxaa lagu sixi karaa;

   **b)** Shirkadu marka ay raacdo qododbka **75aad** faqraddiisa 2aad ee sharcigan una gudbiso diiwaan-hayaha si waafaqsan qodobka **15aad** ee sharcigan ee qoraalka sixidda u hogaansan la'aantii, cinwaanka xarunta dhexe shirkadda iyo waxqabadkeeda howl iyo hannaanka ay ku adeegeyso uu ku tilmaamay xeer-nidaamiyaha wasiirka Ganacsigu.

   **t)** Shirkad wadani ah ama mid shisheeye oo diiwaan gashan una hogaansami weyday nidaamka ku xusan Qod.**75aad** faqradiisa 2aad, waxay ku sixi kartaa in ay diiwaan hayaha u soo gudbiso qoraal dib u sixid ah, diiwaan hayahu si uu ugu diiwaan geliyo. Shirkadda shisheeye ogolaanshihii la siiyay si waafaqsan cutubka 12aad ee sharcigaan buuxisana dhamaan shuruudaha ku xusan cutubka 14aad ee sharcigaan, si ay u saxdo waa in ay u gudbisaa diiwan hayaha qoraalka dib uga noqoshada u hogaansan la'aanta si loogu diiwaan geliyo si waafaqsan cutubka 12aad ee sharcigan.

2. Shirkad isbixin weydey ama sharciga u hoggaansami weydey, waxaa lagu sixi karaa u hogaansan la'aantaas in la kala diro, Marka;

   **b)** Laga reebo sida ku dhigan farqadda 3aad ee qodobkan, magac shirkadeedka ee laga saxay u hogaansan la'aanta waa isla magacii shirkadda ee wafaqsanaa qod.**16aad.**

   Shirkaddu waqtiga ay saxday ku xadgudubka sharciga waa in magaca shirkadeedkaasi waafaqaa qodobka **17aad.** Haddii magaca shirkadda la saxay uusan ku jirin diiwaanadda diiwaan-hayaha sida ku xusan qodobka **16aad,** waxa magaca shirkadeedkaas lagu xusayaa ereyga ah ku xadgudubkii waa laga saxay, laguna xusaa bisha iyo taariikhda uu dhaqan galayo qoraalka sixiddaa ku xadgudubkaas.

   **t)** Magac shirkadeedka shirkaddu waa in uu noqdaa magac shirkadeedka waqtiga la saxay ku xadgudubka waana in uu noqdaa mid la waafajiyay qodobka **16aad.**

3. Marka ay tahay Shirkad shisheeye oo diiwaan-gashan lagana saxay ku xadgudub sharci si waafaqsan farqadda 2aad ee qodobkan, magaca shirkadda shisheeye, waxay ku negaaneysaa magaceedii hore goorta ay saxdo ku xadgudubkeeda.

## Qodobka77aad

***Racfaanka Falka Sharci Darro***

1. Shirkaddu racfaan waa ka qaadan kartaa go'aanka ku xadgudubka sharciga ku xusan qodobka **74aad** ee sharcigan, iyadoo racfaankeeda u gudbinaysa Maxkamadda Gobolka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya deegaanka Xarunteeda dhexe ku taal soddon (30) maalmood gudohood oo ka bilaabata taariikhda dhaqan galka. Shirkaddu, waxay cabashada racfaankeeda u gudbin karta maxkamadda racfaanka si loo baabi'yo go'aanka ku xadgudubka sharciga ama in ay go'aansato in ay saxdo ku xadgudubkaas, qoraalna ku soo saarto oo nuqulkiisa loo gudbiyo diiwaan-hayaha si uu ugu diiwan-geliyo diiwaanka ay khuseeyso. Maxkamaddu si ku meel gaar ah way u amri kartaa diiwaan-hayaha in uu qaado talaabo kasta oo maxkamaddu u maleyso in ay ku haboon tahay.

# CUTUBKA 13AAD

# SOO CELINTA SHIRKAD LA KALA DIRAY

## Qodobka 78aad

***Soo Celinta Shirkad La Kala diray***

1. Shirkad la kala diray waxaa dib loogu dhaqan gelin karaa goorta la wafajiyo qodobka **12aad** ee sharcigan.

## Qodobka 79aad

***Oggolaanshaha iyo Diidmada***

1. Shirkadda la kala diray, waxa dib loogu dhaqan gelin karaa, marka ay buuxiso shuruudaha soo socda;
   - **b)** Hadii ay ogolaanshaha mulkiilayaasha iyo dadka kale ee dan/xaqa ku leh ogolaandaan dib u dhaqan gelinta shirkadda waqtina u qabtaan;
     - **I.** Loona baahdo dib u dhaqan gelinta shirkadda, iyadoo la hab raacayo si waafaqsan xeer hoosaadkeeda.
     - **II.** Haddii xeer hoosaadkeedu uusan sheegin, waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha dib u dhaqan gelinta shirkadda muddo gaaban oo ugu filan diyarinta dib u dhaqan gelinta si waafaqsan sharciga.
   - **t)** Marka xeer hoosaadka shirkadu xusayo si qeexan in mulkiilayaasha iyo dadka kaleba awood u leeyihiin joojinta iyo kala diridda shirkadda sheegina wax kale.

**j)** Marka shirkadda lagu kala diray dacwad qasab ah ama Xeer ilaaliye uu ku soo oogay iyo mulkile/ka badan, waxaa loo baaahan yahay dhammaan ogolaanshaha mid kasta oo ka mid ah mulkiilayaashaas, sida uu qabo qodobkan faqradiisa 1aad xarafkiisa (a).

**x)** Marka shirkadda lagu kala diray dacwad ay soo oogeen mid ama ka badan oo dad shirkada dayn ku leh, xaqa daynleyaashaasi ku leeyihiin shirkadda, waa in la bixiyaa si buuxda.

k**h)** Marka shirkadda lagu kala diray dacwad ay soo oogtay Xeer ilaalinta dhammaan sababaha kala diridda ee ay ku soo oogtay Xeer ilaalinta waa in la maareeyaa, Xeer-ilaaliyaha Guudna uu ogolaadaa dib u dhaqan gelinta shirkadaas.

2. Haddii xeer hoosaadka ama sharci kale sheegay xuquuqda codeynta mulkiilayaasha iyo dad kale in la isugu yeero shir si ogolaansho iyo talooyin looga helo inta aan la diiwan gelin taariikhda shirka iyo arimaha kale ee khuseeya codeynta. Maxkamaddu waa in ay raacdo habka codeynta, sida qodobkaan faqradiisa 1aad xarafkiisa (b) ku shardiyay ama is hor istaagga ku xusan habka codeynta iyo ogolaanshaha.

## Qodobka 80aad

### *Dib-u-Dhaqan Gelin Shirkadeed*

1. Shirkad la kala diray si dib loogu dhaqan geliyo si waafaqsan qodobkan waa in loo gudbiyaa codsiga dib u dhaqan gelinta ah diiwaan-hayaha si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan sheegayo sida;
   - **b)** Magac shirkadeedka shirkadda lagu soo qoro codsiga.
   - **t)** Magac shirkadeedka shirkadu leedahay oo dib loo dhaqan gelinayo, iyadoo ay shardi tahay in magacu waafaqo qodobka **81aad** ee sharcigan.
   - **j)** Taariikhda aasaaska ama diiwaan gelinta shirkadda.
   - **x)** Taariikhda la kala diray shirkadda.
   - **Kh**) Qoraal sheegaya in dhammaan shuruudaha ku dhigan qodobkan in la raacay.
2. Cinwaanka xarunteeda dhexe ee shirkadda iyo waxqabadkeeda ay fulisay shirkadu, iyadoo la raacayo sida ku xusan xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsiga.

## Qodobka 81aad

### *Dib-u-soo Celin Magac Shirkadeed*

1. Magac shirkadeedka shirkadda dib loo soo celiyay wuxuu noqonaya midkii loo bixiyo goortaas, iyadoo la raacayo qodobka **16aad** ee sharcigaan. Shirkadda waqtiga dib loo dhaqan gelinayo magaca shirkadda wadaniga ah in la waafajiyo habka ku xusan qodobka **17aad** sharcigaan. Haddii shirkada shisheeye tahay dib u soo celinteedana ay waafaqsan tahay qodobka **17 aad** magaca shirkadda waa in la

raaciyo "dib loo soo celiyay" bisha, maalinta iyo taariikhda dhaqan galayso dib u soo celintu.

## Qodobka 82aad

### *Saameynta dib-u-Dhaqan-Gelinta Shirkad*

1. Iyadoo la raacayo faqradda 2aad ee qodobkan, marka dib loo dhaqan geliyo jiritaanka shirkadda, waxa laga soo qaadayaa in uu weligii socday kala go'na soo dhex gelin. Shirkadu waxay dib u bilaabaysaa in ay qabato ganacsigii ama hawlihii ay qaban jirtay, sidii iyada oo aan weligeed la kala dirin. Deymaha, waajibaadka iyo masuu'liyad kasta oo ay gashay shirkadu, saamile ama maamule u shaqeeya shirkadda ka hor iyo ka dib kala diridda, waxa lagu dhaqayaa sidii shirkadda oo aan weligeedba la kala dirin.
2. Xuquuqaha mulkiilayaasha iyo dadka kale ee ka dhalatay kala diridaas ka hor inta aan dadkaasi ogaan, dib u dhaqan gelinta saamayn kuma yeelan karto xuquuqdooda.

# CUTUBKA 14AAD

# DIIWAAN GELINTA QORAALADA MAAMULKA

## Qodobka 83aad

### *Shuruudaha Diiwaan Gelinta Shirkadaha*

1. Qoraal kasta oo ah mid ku shardisan ogolaansho ee uu diiwaan geliyo diiwaan hayuhu si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.
2. Si loogu diiwaan geliyo shirkad, sida ku xusan cutukba **15aad** qoraalkeedu waa in uu waafaqa shuruudaha ku dhigan qodobkan iyo shuruucda kale ee kaabaya ama ku dhigan xeerar kale oo dhaqan gal ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Iyadoo aan wax loo dhimayn ku dhaqanka qodobkan faqradiisa 2aad iyo shuruucda & xeerarka kale ee dalku leeyahay oo wax ku kor dhinaya ama ka dhimaya shuruudaha farqadda 2aad ee qodobkan.
4. Qoraallada saxiixan loogama dhigi karo mid ku shardisan diiwaan gelin qoraal si waafqsan qodobka **13aad.**
5. Qoraalada shirkadaha waa in ay ku jiraan dhammaan xogaha ay ku waajibiyeen xeerar dhaqan gal ka ah dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, hadii qoraalkaas aan si kale xeer u jideeyn.
6. Qoraalku waa in uu noqdaa mid habka uu u qoran yahay uu aqbali karo diiwaan hayuhu, iyadoo qoraalkaas ay ku jiraan dhammaan xogaha lagu qorayo qoraalka iyo Afka lagu daabacay.

7. Diiwaan hayuhu, wuxuu dejin karaa in qoraalka loogu soo gudbiyo hal hab iyo ka badan loona soo mariyo hal tab oo kali ah. Diiwaan hayuhu waa diidi karaa qoraal aan loogu soo gudbin habka iyo marinkii uu dejiyay. Hadii diiwaan hayuhu ogolaado in qoraalka loogu soo gudbiyo waraaq, qoraalkaas waa in uu noqdaa mid daabacan uu san noqon mid gacanta ah.
8. Diiwaan hayuhu waa cayimi karaa dhumucda, muuqaalka, tayada, midabka, daabacadda waraaqaha iyo sida qaabkoodu noqonayo.
   Diiwaan hayuhu, isagoo raacayo hanaanka uu sheegayo xeer nidaamiye uu soo saaray Wasiirka Ganacsigu waa fari karaa shuruudo macquul ah iyo sifooyinka kale ee uu yeelanyo qoraalka loogu soo gudbinayo qaabka elektorooonikada.
9. Diiwaan hayuhu waa in uu hubiyo go'aana ka gaaro waqtiga bilowga ee qoraalka loogu soo gudbiyo diiwaan hayaha si elektoroonik ah oo waafaqsan qodobka **13aad.** Muhiimna ma aha in gacanta laga saaro nuqulka qoraalka asalka ah ama nuqulkiisa, hadii dhammaan xogaha loo baahan yahay dhamaanteed laga heli karo qoraalka la soo gudbiyay. Hadii la ogolaado in qoraalka loogu soo gudbiyo diiwan hayaha si elektoroonik ah oo waafaqsan qodobka **13aad** qoraal kale lama soo raacin karo si kasta uu yahay.
10. Haddii diiwaan hayuhu diido hanaanka loogu soo gudbiyay lana raacin xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsiga dhammaan qoraaladaas waxaa loogu soo gudbinayaa diiwaan hayaha iyagoo ku qoran mid ka mid ah afafka Soomaaliga, Carabi iyo Ingriis.
11. Magaca shirkadda ee ku qoran qoraalkaas qasab ma'aha in uu noqdo AF Soomaali, AF Carabi iyo AF Ingiriisi, wuxuuse noqon karaa luqado kale oo aan ahayn intaba.
12. Qoraalka diiwan hayuhu diiwaan gelinayo waa in uu xusaa qodobka ama qodobada sharci oo aan ahayn qodobka **13aad** ee sharcigan haddii ay jiraan, iyadoo laga duulayo in loo soo gudbiyay qoraalka diiwaan hayaha si uu u diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad.**
13. Qoraalku waa in lagu sheegaa magaca/magacyada saxda ah, cinwaanka waraaqaha saamileyda si loogu diiwaan geliyo, balse qasab maaha in lagu sheego qoraalka magacayada iyo ciwaanada in ka badan hal qof.
14. Qoraalka waa in uu la socdaa foom loo buuxiyo si waafaqsan qodobka **85aad.**
15. Qoraalka waa in loo gudbiyaa Diiwaan hayaha si uu u diiwaan geliyo waana in la bixiyaa dhammaan khidmadaha adeeg ee ku waajibtay lana maro habka uu ku tilmaamayo xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsiga.
16. Haddii qoraalka lagu gudbinayo qaab elektoroonik ah, iyadoo aan waxba loo dhimayn xeerarka kale, maalinta u dambaysa ee xiliga diiwaan gelinta qoraalka ee ay ku dhamaato in lagu soo gudbiyo elektoroonik ahaan ay ku toosto maalin fasax ah soo gudbintu waxay noqonaysaa maalinta xigta ee shaqo.

## Qodobka 84aad

### *Been Abuurka Qoraallada Diiwaan Gelinta*

1. Haddii diiwaan hayaha loogu soo gudbiyo qoraal si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, waxay u dhigantaa ogolaanshaha ama ogaanshaha shaqsi kasta oo soo gudbiyay qoraalkaas. Dambi ciqaabeed ayaa ka dhasha goorta laga beensheego kuna dhaco fal shaqsiga soo gudbiyay ama shaqsi kale oo wakiil ka ah si loo diiwaan geliyo loona buuxiyo shuruudaha ku xusan qodobka **13aad** ee sharcigaan iyo xeerka shirkadda.

## Qodobka 85aad

### *Foomamka iyo Bixintooda*

1. Diiwan hayuhu wuxuu u diyaarin kara shaqsiyaadka diiwaan gelinta doonaya "foom", xaashi jeldi leh ama labadaba waana amri kara adeegsi hab gaar ah, marka loo soo gudbinayo qoraal kasta oo waafaqsan qodobka **13aad**. Foomka iyo xaashida jeldiga ah, waxaa ku qornaan kara xog kasta oo diiwaan hayuhu u arko in ay ku haboon tahay, wasiirkuna ku soo saaray xeer nidaamiye si uu u guto waajibka sharcigu saaray dhaqan galkana ka ah dalka Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya. Xogtaas oo ay ku jirto tilmaanta shaqsiga oo qoraalku ku saabasan yahay, cinwaanka shaqsigaas qoraalada loogu hagaajiyo iyo cinwaaka saldhiga shaqsigaas. Foomka ama xaashida jeldiga ah sinaba loogama reebi karo in lagu lifaaqo qoraal, hadii uu san sharcigu si kale u dhigin ama diideyn.
2. Foomka ama xaashida jeldiga ah, waxa laga soo qaadayaa in uu ka yahay qayb qoraalka la diiwaan gelinayo ee loo adeegsaday foomka ama xashidaas. Xogta ku jirta foomka ama xaashida ayaa ka leh mudnaan xog kasta oo aan waafaqsanayn oo ku jirta qoraalada kale oo la diiwaan gelinayo.
3. Diiwaan hayuhu wuxuu bixin karaa, marka laga soo codsado, foomka iyo xaashida uu diiwaan hayuhu shardi ka dhigay in loo adegsado diiwan gelinta qoraalada si waafaqsan qodobkan.

## Qodobka 86aad

### *Khidmadaha iyo Ciqaabaadka*

1. Diiwaan hayuhu waa in uu ku waajibiyo kana qaadaa khidmadaha adeegga ku waajibay diiwaan gelinta qoraalada;
   - **b)** Adeegga loo qabtay iyo diiwaan gelinta qoraalada sharcigani ku waajibiyay cid kasta oo qoraal diiwan gelin u soo gudbisa diiwaan hayaha.
   - **t)** Daabicid shahaado bixin iyo diiwaan gelinta qoraalada

2. Wasiirka Ganacsiga, wuxuu ku waajibin karaa khidmado adeeg oo kale iyo ciqaabo ganaaxyo ku saleysan si wafaqsan sharcigaan.
3. Khidmadahaasi iyo ganaaxyadaas waa in hadba Wasiirka Ganacsiga ku tilmaamo xeer nidaamiye kuna xadidaa qadar wadareedkooduna ka badnaan cadadka kharashka dadab iyo toosba ku baxay intii adeegga lagu bixiyay si waafaqsan sharcigaan.
4. Shirkaddii shisheeye ee howl ka fulisa dalka gudihiisa iyadoon haysan fasax ogolaansho waxay mutaysanaysaa ciqaabahan soo socda;

   **b)** Ganaax dhaqaale
   **t)** Ciqaab xarig
   **j)** La wareedid hanti
   **x)** Musaafurin
   **kh)** Barkood dhammaan inta sare ku xusan.

## Qodobka 87aad

### *Dhaqan Galka Diiwaangelinta*

1. Marka laga reebo sida ku xusan qodobkaan faqradiisa 2aad iyo 4aad qoraalada uu diiwaan geliyay diiwaan hayuhu waa dhaqan gal:
   **b)** Haddii aan lagu sheegin qoraalka la diiwaan geliyay xiliga dhaqan galkiisaa waa taariikhda la diiwaan geliyay.
   **t)** Haddii waqtiga dhaqan galka lagu sheegay qoraalka la diiwaan geliyay, wuxuu noqonayaa dhaqan galkiisu waqtigaas qoraalka la diiwaan geliyay ku xusan.
2. Qoraal la diiwaan geliyay, waxaa lagu sheegi karaa waqtiga iyo taariikhda dhaqan galka oo dib loo dhigay. Haddii uu sidaas dhigayo qoraalka la diiwaan geliyay, wuxuu dhaqan gal noqonayaa muddada ku xusan dib u dhigga, taariikhda qoraalka la diiwaan geliyay oo ka diiwaan gashan Diiwaan hayaha.
3. Hadii qoraal la diiwaan geliyay uu sheego taariikhda dib loo dhigay ee dhaqan gal, balse aan lagu sheegin waqti qoraalka la diiwaan geliyay, wuxuu dhaqan gal noqonayaa 11:59 duhurnimo ka dib taariikhda ku dhigan qoraalka ama waqtiga iyo taariikhda qoraalka la diiwaan geliyay diiwaan hayaha ayaa laga tix raacayaa.
4. Hadii qoraalka la diiwaan geliyay sheegayo taariikhda dhaqan galka ee dib loo dhigay taas oo ka danbaysa maalinta sagaashanaad (90) ee taarikhda la diiwaan geliyay qoraalka, qoraalka la diiwaan geliyay, wuxuu dhaqan gal noqonayaa 11:59 duhurnimo ee maalinta sagaashanaad (90) laga soo bilaabo taariikhdii la diiwaan geliyay.
5. Qoraal la diiwaan geliyay, wuxuu sheegi kara hannaanka arrimaha lagu sheegay qoraalka la diiwaan geliyay oo laga soo qaadayo in ay u dhaceen si waafaqsan qodobkan iyo qodobbo kale ee sharcigaan, haddii ay is khilaafaan qodobkaan

faqradiisa 2aad iyo qodobbada kale, waxaa la raacaya sida ku xusan qodobbada kale.

6. Hadii qoraal la diiwaan geliyey uu sheegayo taariikhda dhaqan galka oo dib loo dhigay si waafaqsan qodobkan faqradiisa 2aad, qoraalka la diiwaan geliyay waa laga joojin karaa in uu noqdo dhaqan gal. Hadii shaqsiga uu la xiriiro qoraalka la diiwaan geliyay uu u soo gudbiyo diiwaan hayaha si uu ugu diwaan geliyo si waafaqsan qodobka **15aad** ee sharcigan, taariikhda dhaqan galka ee lagu sheegay qoraalka ama ka hor maalinta sagaashanaad (90) ka dib taariikhda la diiwaan geliyay qoraalka dib waa u la noqon karaa qoraalka la diiwaan geliyay si uu u saxo.
7. Haddii laba qoraal ama in ka badan hal mar loo soo gudbiyo diiwaan hayaha, waxaa laga soo qaadaya in la diiwaan geliyay hal mar, hadiise diiwan hayuhu diido mid ka mid ah qoraaladaas, waxaa laga soo qaadayaa in uu wada diiday diiwan-gelintooda.

## Qodobka 88aad

### *Diiwaan Gelinta Qoraal Dib loo Saxay*

1. Haddii aan sharcigu si kale u sheegin shirkaddu waxay dib u qori kartaa;
   - **b)** Qoraalkeeda aasaaska ama midkeeda diiwaan-gelinta ee shirkad jirta goor kasta, iyadoo u soo gudbineysa dhammaan samileyda ama shaqsi kale oo sharcigu u ogolaaday qoraalka wax ka beddelka cusub, diiwaan-hayaha si uu ugu diiwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.
   - **t)** Dib u qoridda qoraalka, waxa ku jiri kara hal iyo ka badan oo kaabis ah ama wax ka beddel ah. Haddii wax ka bedelkaasi taabanayo qoraalkii aasaaska ahaa ee lagu diiwan-geliyay shirkadda sida uu qabo sharcigan, wax ka beddelkaasi, wuxuu;
     - I. Tirtiri karaa magacyada iyo ciwaannada aasaasayaasha shirkada ama dad kale, magaca iyo ciwaannada dadkii diiwaan-gelinaya shirkadda.
     - II. Tirtiri karaa magacyada iyo ciwaannada mid ama dhammaan dadka lagu magacaabay qoraalka in ay yihiin dadkii keenay qoraalka aasaaska si loo diiwaan-geliyo.
     - III. Tirtiri karaa ciwaanka xarunta dhexe ee shirkada.
   - **j)** Shirkadda wax laga bedelay qoraalkeeda aasaaska ama midkeeda diiwaan-gelinta oo ah shirkad jirta waa in ay u soo gudbisaa diiwaan-hayaha si uu ugu diwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** wax ka bedelka sheegaya:
     - I. Magac shirkadeedka shirkada
     - II. Qoraalka dib u sixidda qoraalka
   - **x)** Marka laga diiwaan-geliyo wax ka beddelka qoraalka, diiwaan-hayaha, taarikhda dhaqangal ee dib loo dhigay ee uu sheegay wax ka beddelku, waa in laga habraacaa qodobka **87aad** ee sharcigan. Qoraalka aasaaska ama qoraalka dambe ee diiwaan-gelinta shirkad jirta ee wax laga beddelay ayaa ah ka saxda ah

ee la qaadanayo goorta la diiwan-geliyo dhammaan wax ka bedelladii ka horreeyey ee lagu sameeyey nuqullada qoraalladii hore.

## Qodobka 89aad

### *Sixidda Qoraal La Diiwaan-geliyay*

1. Shaqsi, wuxuu u soo gudbin karaa diiwaan-hayaha si loogu diiwaan-geliyo codsi sixid si waafaqsan qodobka **13aad;**
   **b)** In loo saxo qoraal la diiwaan geliyay, hadii qoraalka la diiwaan geliyay ay ku jirtay xog qalad ahayd waqtigii qoraalka loo soo gudbinayay diiwaan-hayaha si uu uga saxo una diiwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.
   **t)** Uu dib u la noqdo qoraal la diiwan-geliyay si waafaqsan qodobka **87aad** faqradiisa 3aad ee sharcigan.
2. Qoraalka sixitaanka ahi waa in;
   **b)** Lagu sheegaa magaca shirkadda qoraalka sixiddu la xiriirto.
   **t)** Uu Tilmaamaa qoraalka la diiwaan-geliyay si uu ugu qanco diiwaan-hayuhu.
   **x)** Uu Sheegaa xogtii qaladka ahayd ee ku jirtay qoraalka la diiwaan-geliyay una baahan in laga saxo.
   **kh)** Uu Sheegaa oraahda sixitaanka.
   **d)** Haddii uu dib u la noqonayo qoraal la diiwaan-geliyay si waafaqsan qodobka **87aad** faqraddiisa 3aad ee sharcigan, la sheegaana in qoraalkii hore loo diiwaan-geliyay lala noqday.
3. Marka laga reebo sida ku xusan faqraddan qoraalka sixitaanka, waxaa uu dhaqan galaya taariikhda dhaqan galka qoraalka la diiwaan geliyay, iyadoo la raacyo taariikhda ku taal diwaanada diiwaan hayaha. Shaqsiga qoraalka loo diiwan geliyay ee aanu saxnayn, sixitaanka lagu saameeyay, wuxuu dhaqan gelayaa taariikhda la diiwaan geliyo. Qoraalka sixitaanka ee ku dhigan taariikhda hore ee la diiwaan geliyay, wuxuu dhaqan gal noqonayaa taariikhdaas hore ama taariikhda qoraalka laga diiwaan geliyay diwaanada diiwaan hayaha, iyadoo loo eegayo taariikhda ku qoran diiwaanada diiwaan hayaha sida ay u kala dambeeyeen. Qoraalka sixitaanku qasab maaha in uu sheego taariikhda dhaqan galka oo dib loo dhigay si ay u dhaqan galo qoraalka sixitaanka laftiigiisu.

## Qodobka 90aad

### *Wax ka Beddelka Qoraalka*

1. Shaqsi waa beddeli/tirtiri karaa ama dib u la noqon kara qoraal la diiwaan geliyay, hadii ay jiraan duruufo la soo gudboonaday shirkadda diiwaan gelinta ka dib, kana

dhigaya mahuraan in la bedelo qoraalkeedii laga diiwaan geliyay diiwaan hayaha haddii uu keligiis leeyahay Shirkadda.

2. Qoraalka la diiwaan geliyay, wuxuu noqonayaa mid la bedelay marka loo gudbiyo diiwaan hayaha si uu ugu diwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad,** qoraalka wax ka bedelista waa in;
   - **b)** Lagu sheegaya magac shirkadeedka shirkada qoraalku la xiriiro.
   - **t)** Tilmaamaa qoraalka la diiwaan geliyay, iyadoo la raacayo hanaanka uu ku tilmaamo xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsiga.
   - **j)** La sheegaya xogta ku jirtay qoraalka la diiwaan geliyay ee la doonayo in la bedelo.
   - **x)** La sheegaya wax kasta oo in bedelaad lagu sameeyey la doonayo.
   - **kh)** La sheegaya xog kasta oo lagu daray amba laga dhimay qoraalkii diiwaan gashana, hadii ay jirto.
   - **d)** Wax ka beddelka la waafajiyey dhammaan shuruudaha ku dhigan sharcigan oo ku saabsan wax ka beddelka qoraallada.
3. Haddii shaqsi uu si gaar ah ugu ogolaaday ama ku waajibiyey sharci kale oo aan midkan aheyn, in uu wax ka beddelo/tirtiro ama dib u la noqdo qoraalka la diiwaan-geliyay oo kali ah, si waafaqsan sharcigan ama sharci kale u ogolaado wax ka beddelidda si waafaqsan qodobkan.
4. Qoraalka wax ka beddelka ah iyo qoraalka uu saameeyo wax ka beddelkuba, waxay ku dhaqan gelayaan si waafaqsan qodobka **87aad** ee sharcigan.

## Qodobka 91aad

### *Beddelidda Ciwaanka Xarunta dhexe ee Shirkadda*

1. Shirkadi waxay ku beddeli karta ciwaanka xarunteeda dhexe oo kaliya in ay ku sheegto ciwaankii hore mid ka gaddisan qoraalkeeda cusub,
   - **b)** Qoraalka wax ka beddelka ee loo diiwaan-geliyey si waafaqsan qodoka **88aad** ee sharcigan.
   - **t)** Warbixin sanadeedka loo diiwaan geliyey si waafaqsan qodobka **72aad** ee sharcigan.
   - **j)** Foomka ama waraaqo kale oo uu diiwaan-geliyey diiwaan-hayuhu si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, diiwaan-hayuhuna tilmaamay isagoo raacaya xeer nidaamiyaha isbeddellada lagu dhaqo iyo qoraallada kala diridda.

## Qodobka 92aad

### *Waajibka iyo Hannaanka Diiwaan-hayaha*

1. Haddii qoraal loogu soo gudbiyo diiwaan-hayaha habka ku dhigan qodobka **13aad** ee sharcigan oo waafaqsan qodobka **84aad,** Diiwaan-hayahu waa in uu hubiyaa in

codsaduhu bixiyey dhammaan khidmadaha adeeg ee ku waajibay isagoo raacaya habka uu tilmaamay xeer nidaamiyaha wasiirka ganacsiga si uu u diiwaan-geliyo. Diiwaan-hayaha waxaa waajib ku ah in uu go'aan ka gaaro in qoraalku waafaqsan yahay qeyb ama dhammaan shuruudaha uu dhigayo xeer nidaamiyaha Wasiirku.

2. Diiwaan-hayuhu, wuxuu ku diiwaangeliyaa qoraallada, isagoo suntaya ama si kale ugu qoraya ereyga "waa la diiwaan-geliyay", waqtiga iyo taariikhda diwaan-gelinta qoraalka dushiisa. Marka uu qoraalku yahay aasaaska ama qoraalka diiwaan-gelinta shirkad jirta, wuxuu ku darayaa faallo waafaqsan hannaanka Wasiirka Ganacsigu tilmaamay kuna xusan xeer nidaamiye gaar u ah nooca ganacsigas.
3. Marka qoraalku yahay mid goor dambe loo gudbiyey diiwan-hayaha si uu u diiwaan-geliyo kuna saabsan shirkad la sameeyey ama la diiwaan-geliyay, lambarka tilmaamaya qoraalka aasaaska waa in lagu daro dhammaan qoraallada la xiriira diiwaan-gelinta.
4. Diwaannada qoraallada soo gala diiwaannada diiwaan-hayaha, si uu u keydiyo waa in ay ahaadaan hab-qoraal la diiwaan-geliyay oo diiwannada laga heli karo una qoran qaab muuqda oo la garan karo, iyadoo ay la socoto taariikhda la diiwaan-geliyay.
5. Haddii diiwaan-hayuhu qabto qoraal gacanta loogu keenay oo uu diido in uu diiwaan geliyo, diiwaan-hayuhu waa in uu u celiyaa shaqsigii gacanta ugu keenay raacsiiyana sababta loo diiday oo si kooban u faah faahsan muddo soddon (30) malamood gudahood ah oo ka bilaabanta maalintii loo keenay diiwaan-hayaha in uu diiwaan-geliyo.
6. Waajibka diiwaan-hayaha ee diiwaan-gelinta qoraalladu ee ogolaanshaha iyo diidmada diiwaan-gelinta qoraalladu waa in ay waafaqdaa xeernidaamiyaha Wasiirka.
   **b)** Ma saamayso saxnimada iyo tiridda qoraalka qeyb ahaan ama guud ahaan;
   **t)** Mana la xiriirto saxnaanshaha ama qaladka xog ku jirta qoraalka;
   **j)** Ma abuuri karto in laga soo qaado in qoraalku yahay ansax ama mid aan jirin iyo xog ku jira qoraalku in ay yihiin sax ama qalad.
7. Iyadoo aan wax loo dhimeyn faqradda hore iyo xeerarka kaleba, diiwaan-hayuhu, marka uu ka helo codsi qoraal ah oo muujinaya sabab macquul ah oo uu u soo qoray shaqsi awood u leh lana soo ansaxiyay sixidda hubinta qoraalada.
   **b)** Haddii diiwaan-hayahana ay la noqoto, isagoo raacaya xeer-nidaamiyaha wasiirka ganacsiga, wuxuu ka bixin karaa qoraalka xog shaqsi oo tilmaamaysa si waafaqsan qodobkan, haddii aan xogtaasna sharcigu waajib ka dhigeyn ku dariddeeda.
   **t)** Iyadoo aan waxba loo dhimeyn sharcigan ama xeer kale, qoraalka diiwaanka diiwaan-hayuhu ka saaro xogta tilmaamaysa shaqsi si waafaqsan qodobkaan faqradiisa 5aad ka saarid xogtaas ama sixitaankeedu ma ka dhigayso qoraalka mid kala dhiman oo aan waxtar lahayn.

**j)** Diiwaan-hayuhu, wuxuu hayn karaa nuqulka asalka ah ama rogan ee diiwaanka oo ay ku jirto xogta shaqsiga tilmamaysa, balse qoraalkaas ama diiwaankaasi waa in uu noqdaa mid u furan in laga baaro nuqullada iyo qoraallada daabacan ee diiwaanka ku jirta. Diiwaan-hayuhu, wuxuu bixin karaa oo keli ah qoraalka ku jira diiwaanka, marka uu helo codsi qoran oo sababababaysan isla markaana aan waxba loogu dhimeyn qodobbada sharcigan.

8. xogta tilmaamaysa shaqsiga, waxaa ka mid ah xog ku saabsan shaqsi caadi ah ee lagu asteyn karo qofkaas sida:
   **b)** Tilmaame dawladeed ama Lambarka u qarsoodi ah iwm.
   **t)** Lambarka qarsoodi ah oo tilmaamaya qofka.
   **j)** Lambar iyo tiro sir u ah qofka oo uu u adeegsado dano kale.

## Qodobka 93aad

### *Racfaanka Diidmada Diiwaan-gelinta*

1. Haddii diiwaan hayuhu diido in uu diiwaan geliyo qoraal loogu keenay in uu diiwaan geliyo, shaqsiga u keenay diiwaan hayaha qoraalka, wuxuu afartan iyo shan (45) maalmood ka dib taariikhda lagu war geliyay diidmada ayey dhaqan galeysaa si waafaqan qodobka **92aad** faqradiisa 3aad ee sharcigaan. Mudadaas ka hor, wuxuu diidmadaas racfaanka uga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya. Racfaanku, wuxuu bilaabmayaa taariikhda cabashada loo gudbiyo maxkamadda ee lagu codsanayo in lagu amro diiwaan-hayaha in uu diiwaan-geliyo qoraalka, iyadoo loogu lifaaqayo diiwaan-hayaha nuqulada qoraalka diidmada.
2. Maxkamaddu, waxay ku amri kartaa diiwaan-hayaha in uu diiwaan-geliyo qoraalka ama uu qaado tallaabooyinka kale ee maxkamaddu u aragto in ay ku habboon yihiin.

## Qodobka 94aad

### *Caddeymaha Diiwaan-gelinta*

1. Marka la diiwan-geliyo shirkadda, waa in diiwan-hayuhu gacanta ka saaro "Shahaado" uguna lifaaqo nuqulka qoraal sita saxeexiisa ama saxiixa oo sawiran isla markaana shaabbadeysan, sheegaysana in qoraalka laga diiwaan-geliyay diiwaannada diiwaan-hayaha.

## Qodobka 95aad

### *Diiwaan-hayuhu Shahaadooyinka Uu Bixiyo*

1. Diiwaan-hayuhu, waxa uu siinayaa shaqsi kasta oo qoraalkiisa la diiwaan-geliyay, marka uu soo codsado nuqul ka mid ah qoraal uu u diiwaan geliyay si waafaqsan sharcigan, shahaado loo soo saaray amba la socota nuqul ka mid ah qoraal kasta oo la diiwaan-geliyay oo tilmaameysa qoraalka la diiwaan-geliyey kana marag kacaysa in nuqulku yahay saxda, haddii ay la habboonaato iyadoo lagu sugayo shahaado jirintaanka shirkadda. Diiwaan-hayuhu, wuxuu siinayaa shaqsi kasta, marka uu soo codsado shahaado diiwaan-gashan oo diiwaan-hayuhu diiwaan-geliyay, goorta ay u la muuqata in ay gar tahay bixinteedu.

   Shahaadada uu soo saaro diiwaan-hayuhu iyo qoraalka ku dul qoran, waxaa loo qaadanayaa wax dhab ah oo caddeynaya oo sharciyanna shaki la gelin karin.

## Qodobka 96aad

### *Diidmada Diiwaan-gelin Qoraal*

**1.** Shaqsigii ay si dadban u saamaysey arrin la xiriirta shirkad uu shaqsi keeni waayay ama diiday in uu u keeno qoraalkeeda diiwaan-hayaha, si uu ugu diiwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, wuxuu u caban karaa maxkamadda awoodda u leh ee Dowladda Xubinta ka ah Dowladda Federaalka taas oo ay ku taal xarunta dhexe ee shirkadda. Haddii xarunta dhexe ee shirkaddu ku taal Banaadir, wuxuu u caban karaa Maxkamadda Gobolka Banaadir.

2. Haddii shirkaddu ku lahayn xarun dhexe Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya, wuxuu u caban karaa maxkamadda Gobolka Banaadir si loogu diiwan-geliyo qoraalka shirkadaas una amarto in qofka ay khuseyso uu ugu gudbiyo qoraalka diiwaan-hayaha si uu ugu diwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan. Haddii maxkamaddu go'aansato in ay habboon tahay in qoraalka la diiwaan-geliyo horana aan loo keenin ama ay jirtay diidmo in qoraalka loo gudbiyo diiwaan-hayaha si uu ugu diiwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, Maxkamaddu, waxay amarysaa diiwaan-hayaha in uu u diiwaan-geliyo qoraalka qaabka ay u ansixisay maxkamadu.

## Qodobka 97aad

### *Awoodaha Wasiirka*

1. Wasiirka Ganacsigu, wuxuu leeyahay dhammaan awoodaha daruuriga u ah si uu u guto waajibaadka uu saaray sharcigani oo ay ka mid tahay soo saaridda xeer-

nidaamiye uu habraaco diiwan-hayuhu si uu u fuliyo howlaha diiwan-gelinta qoraallada shirkadaha dalka ka howl gala oo sharcigani ku waajibinayo.

## Qodobka 98aad

### *Ogaysiisyada Diiwaan-hayaha*

1. Diiwaan-hayuhu waa in uu gaarsiiyaa wargelinnada shaqsiyaadka ka mid ka ah shirkadda ama danta ku leh sida uu farayo sharcigani, isagoo raacaya hannaanka uu ku tilmaamay xeer-nidaamiyaha wasiirka wasaaradda ganacsigu, waxaana wargelintaas lagu sameyn karaa hannaanka elektorooniga, Boostada iyo gacan saarba.
2. Faqradani ma saamayneyso shuruudaha kale ee la xiriira wargelinta diiwaan-hayuhu ay tahay in uu ka hab raaco sida ku xusan sharcigan ama xeerar kale.
3. Midkoodna go'aanka ah in uu bixiyo ama bixin waayo wargelinta ku xusan qodobkan faqraddiisaa 1aad ama ay soo gaarin wargelintii la bixiyay, ma saamayn karo waajib ama shardi ku xusan qodob ka mid ah sharcigaan, cudurdaarna u ma noqon karto in aan shaqsigu fulin waajib ama shardi uu xusay qodob ka mid ah sharcigan.

# CUTUBKA 15AAD

# SHIRKADAHA SHISHEEYE

## Qodobka 99aad

### *Waajibnimada iyo Ogolaanshaha Shirkad Shisheeye*

1. Shirkadaha Dalka iyo kuwa shisheeye si ay uga ganacsadaan Dalka waa in ay ka helaan ogolaansho ganacsi wasaaradda ganacsigeedu/howsheedu ay khuseyso, waafaqana qodobka**14aad** ee sharcigan iyo qoraalka ogolaanshaha lagu siiyey shirkadda shisheeye oo la galiyey diiwaannada diiwaan-hayaha. Haddii xukunada sharcigan qodobkiisa**14aad** ay iska hor yimaadaan sharci kale oo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhaqan gal ka ah Shirkadda shisheeye, waxaa lagu dhaqayaa sharcigaas ama xeerkii kale mana lagu dhaqayo qodobka**14aad.**
2. Shirkadda shisheeye loo qaadan maayo in ay howl ganacsi ka fulisay gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, marka laga fiiriyo fasirka qodobkan faqradiisa 1aad, sababta oo ah goorta uusan ku qaban gudaha dalka Soomaaliya mid ama in ka badan hawlaha soo socda;
   **b)** In uusan ku qaban shirarka mulkiilayaashiisa, maamuleyaashiisa ama ka fuliyay hawl kale oo la xiriirta arimaha dakhliga shirkadda.

t) In shirkadu ku qabatay hawl mar ah oo ku dhamaatay sodon maalmood gudohood isla markaana aan ahayn mid dhowr jeer soo noqnoqotay iskuna dabeecad ah.
j) Shirkad shisheeye markay ahayn faaida doon, balse bixiso adeegyo bulsho ama deeqo.

3. Qodobkan ma xadidayo mana lagu samayn karo in laga qaado adeeg shirkad shisheeye oo aan haysan ogolaansho fasax ganacsi ama qabashada howlo kale in ay ka fuliso gudaha dalka Soomaaliya. Maxkamada madaniga ee Jamhuuriyada Fedraalka Soomaaliya ayaa awooda u leh in dacwadeeda ku qaado dalka ama wargelin ku gaarsiiso shirkad shisheeye hab raac kasta, ogeysiis, dalab uu waajibiyey sharci in la gaarsiiyo, iyadoo la raacayo axkaamta shareecada ama qodobada xeerka habka madaniga ee soomaaliyeed.

## Qodobka 100aad

### *Cawaaqibka Fasax La'aanta*

1. Sharciyan shirkad shisheeye oo aan haysan ogolaansho, ganacsi iyo hawl midna kama qaban karto gudaha Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Shirkadda iyo wakiilkooduna dacwad kama oogi karaan maxkamad ku taal Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu u soo urursado dayn ama u fuliyo waajibaad ilaa inta qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye laga geliyo diiwaannada diiwaan-hayaha.
2. Maxkamaddu way joojineysa dacwadaha ay soo oogaan shirkadda shisheeye ilaa inta ay ka hubsaneyso in shirkadda shisheeye ay leedahay qoraal ogalaansho oo ku jira diiwaannada diiwaan-hayaha. Haddii maxkamaddu hubsato in shirkadda shisheeye loo geliyay qoraalkeeda ogolaansho diiwaannada diiwaan-hayaha, maxkamaddu way sii bilaabi kartaa dhageysiga dacwaddooda. Dacwad ka socota maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ay dhinac ka tahay shirkad shisheeye, ka dib taariikhda dhaqan galka qoraalka ogolaanshaha, lama diidi karo mana la joojin karo sabab qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay oo ku jirin diiwaannada diiwaan-hayaha.
3. Shirkad shisheeye oo ganacsi ama hawl ka wadda gudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo fasax ogolaansho haysan, waxay muteysanaysaa ciqaabaha ku xusan ka **86aad** ee sharcigan. Shirkad shisheeye oo ganacsi ama hawl ka wadda gudaha dalka Soomaaliya, iyadoo aan haysan qoraalka oggolaansho, diiwan hayaha iyo cidda wakiilka ka ah shirkadda ma u diiwaan-gelin karaan qoraal ogolaansho been abuur ah.
4. Garyaqaanka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayaa ku furayo ashtako lid ku ah shirkadda shisheye maxkamadda awoodda u leh. Marka ay maxkamadu hesho in shirkada shisheeye ama maamulkeeda/wakiilkeeda uu qabtay

hawl ganacsi ama shaqo kale gudaha dalka Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya si ka soo horjeeda qodobka **14aad** ee sharcigaan. Maxkamadu, waxay soo saari kartaa xukun ka joojinaya shirkadda iyo maamuleyaasha/wakiilladaba in ay ka qabtaan ganacsi ama ka fuliyaan hawl gudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya bixiyaanna dhamaan wadarta lacageedka ganaaxa iyo Kharashka qareenada dacwadda shirkada shisheeye si waafaqsan qodobka **14aad.**

5. Iyada oo aan waxba loo dhimeyn qodobkan faqradiisa 1[aad], macaamilka ganacsi ama hawlaha ay shirkad shisheeye ka samaysay gudaha Dalka Soomaaliya, iyada oo aan helin qoraalkii ogolaansho uguna jirin diiwaannada diiwaan-hayaha waxba yeeli mayso ansaxnimada ficilada shirkada shisheeye kamana joojinayso in uu iska difaaco ashtako lid ku ah oo looga oogay gudaha dalka Soomaaliya.

## Qodobka 101aad

### *Oggolaansho Siinta Shirkad Shisheeye*

1. shirkadda shisheeye waa in ay u keentaa qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay diiwaan hayaha si uu ugu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **14aad** ee sharcigan sida uu sheegayo oo ah;
   - **b**) Magaca saxda ah oo ay qaadatay.
   - **t)** Dalka lagu aasaasay.
   - **j)** Qaabka shirkadda looga aqoonsan yahay sharciga dalka lagu aasaasay.
   - **x)** Cinwaanka xarunteeda dhexe iyo
   - **kh)** Taariikhda uu ka bilaabay ama la filayo in uu ka bilaabo ganacsiga ama hawl dalka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya.

## Qodobka 102aad

### *Wax ka Beddelidda Qoraalka Oggolaanshaha*

1. Haddii shirkad shisheeye ay duruuftu ku kalifto in ay wax ka beddesho qoraalka la diiwaan geliyay oo ogolaansho lagu siiyay, si ay uga ganacsato ama hawl uga qabato dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in ay u keento diiwaan hayaha si uu ugu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.

## Qodobka 103aad

### *Saameynta Qoraalka Oggolaansho Siinta*

1. Shirkad shisheeye ee oggolaansho loo siiyey in ay ka qabato ganacsi ama hawlo gudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa oggolaanshahaas

dhaqan galkiisu ka bilaabanayaa taariikhda oggolaanshaha la siiyay ilaa taariikhda dib loogala noqonayo ogolaanshahaas.

2. Shirkad shisheeye ee la siiyay ogolaansho in ay ka ganacsato ama ka qabato hawlo gudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxay dalka gudahiisa ku yeelanaysaa xuquuqo iyo mudnaan la mid ah shirkadaha dalka, haddii ay san jirin xeerar kale oo si ka duwan sheegaya, waxaana ku waajibaya masuuliyado la mid ah Shirkadaha wadaniga ah.
3. Qodobka **16aad** ee sharcigan ma siinayo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya awood ay ku nidaamiso shirkadaha shisheeye oo ay ogolaanshaha siisay, dhismaha aasaaskooda, jiritaankooda iyo kala diridoodaba.
4. Shirkad kasta ee shisheeye oo ka qabanaysa ganacsi ama hawlo gudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sharciga dalka lagu aasaasay Shirkadda shisheeye ayaa nidaminaya dhismaha iyo arimaha gudaha ee shirkada shisheeye iyo masuuliyaadka mulkiilayaasha iyo maamulkoodaba.

## Qodobka 104aad

### *Ogolaansho kala Noqosho Shirkad Shisheeye*

1. Shirkad shisheeye oo ogolaansho u haysatay in ay ka qabato ganacsi ama ka fuliso hawl **sharcigu oggolyahay** gudaha Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa ka tanaasuli kartaa ogolaanshahaas, iyadoo u gudbineysa diiwaan hayaha si uu ugu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, qoraalka shirkada shisheeye ee dib uga noqotay ama lagala noqday ogolaanshaha, waa in la sheego;
   **b)** Magaca saxda ah (hore) iyo magaca ay qaadatay, haddii uu jiro;
   **t)** Cinwaanka waraaqaha ee wax loogu diri karo si waafqsan qodobka **116aad** faqraddiisa 1aad xarafkiisa (j) ee sharcigan.
   **j)** Cinwaanka xarunteeda dhexe ee shirkadda.
   **x)** Dalka lagu aasaasay shirkadda.
   **kh)** Soo caddeyso in wax ganacsi iyo hawl ah ka qabanayn gudaha Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya kana talo-baxday/xeen ogolaanshihii shaqo oo ay haystay/teen.
   **d)** In magaciisa ganacsi ee ugu jiray diiwaanada diiwaan-hayaha ee waafaqsan sharciga khuseeya iyo magaca ay ku hawl-galaysay lagala noqday laga bilaabo taariikhda dhaqan galka qoraalka dib uga la noqoshada shirkadda shisheeye.
2. Shirkadda shisheeye, haddii qoraalka dib u la noqoshada u keento diiwaan-hayaha si uu ugu diiwaan-geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, ka hor taariikhda warbixin sannadeedka shirkadda shisheeye keeni lahayd si waafaqsan qodobka **72aad** ee sharcigan. Shirkadda shisheeye, waxa laga deynayaa waajibkii ku saarnaa in ay u keento warbixin sanadeedka iyo khidmaddii la socotay.

## Qodobka 105aad

### *Wargelin dib ula Noqosho Oggolaansho Shirkad Shisheeye*

1. Haddii shirkad shisheeye qoraal dib ula noqosho loo diiwaan geliyay si waafaqsan qodobka **104aad** aan laguna gaarsiin karin hab raacii u diinwaan-gashanaa taasoo la xiriirta dacwad ka dhalatay mudadii uu ogolaanshahu dhaqan galka ahaa. Shirkadda shisheeye, waxaa lagu wargelin karaa habka waraaqo diridda la diiwaan geliyay lana sugay oo loogu hagaajiyay cinwaanka xarunteeda dhexe ee ka diiwaanshan diiwannada diiwaan hayaha. Wargelinta shirkad shisheeye, waxay dhan tahay marka;
   **b)** La helo hab raaca sharci wargelineed ama dalabka shirkada shisheeye.
   **t)** Shan maalmood ka dib marka waraaqaha la diro.
   **j)** Taariikhda ku qoran waraaqaha helintaanka ee dib loo soo celiyay oo shirkadda shisheeye soo saxiixday.
2. Qodobkan faqradiisa 1aad matali mayso habka keliya oo waajibka ah ee lagu wargelin karo Shirkad shisheeye oo la diiwaan geliyay qoraalkeeda dib u la noqosho.

## Qodobka 106aad

### *Shirkad shisheeye Oo Diiwaan Hayuhu Diiwaan geliyey*

1. Shirkad shisheeye ee jirta qoraalka loo diiwaan geliyay ee ogolaanshaha shaqo gudaha dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa laga soo qaadayaa in uu yahay qoraalka ogalaansho siinta Shirkad shisheeye.

# CUTUBKA 16AAD

# QODOBBADA KALA DUWAN EE KALA GUURKA

## Qodobka 107aad

### *Shirkadaha Jira*

1. Shirkad kasta oo ka diiwan-gashan diiwaan-hayaha Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid jirta, waxaana lagu dhaqayaa sharcigan oo dhowraya xuquuqda iyo waajibaadka shirkadda, saamileyda iyo maamuleyaasha.

## Qodobka 108aad

### *Diiwaan Gelinta iyo Ciqaabaadka*

1. Shirkad kasta oo jirta waa in ay isu diiwaan gelisaa si waafaqsan sharcigan 30 maalmood gudohood ka dib taariikhda dhaqan galka sharcigan, iyadoo u keeneysa diiwaan hayaha qoraal codsi diiwaan gelin shirkad jirta si uu ugu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.
2. Shirkad kasta oo jirta oo ku guul daraysata ama diida in ay ugu keento diiwaan hayaha si uu ugu diiwaan geliyo waqtiga ku xaddidan qodobkan faqradiisa hore ama bixin weyda khidmada adeega diiwaan gelinta, shirkadu, waxay muteysanaysaa ciqaab waafaqsan qodobka **86aad** ee sharcigan.

## Qodobka 109aad

### *Diiwaan Gelinta Shirkad Jirta*

1. Qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta waa in uu sheegaa:
   - **b)** Magac shirkadeedka shirkad jirta oo ay tahay in uu waafaqo cutubka 3aad ee sharcigan, hase yeeshee haddii qoraalka diiwaan gelinta shirkadda jirta loogu soo gudbiyo 30 maalmood gudohood ka dib taariikhda dhaqan galka sharcigan diiwaan hayaha si uu u diiwaangeliyo, magac shirkadeedka shirkadda jirta loogama baahna inuu waafaqo cutubka 4aad qodobkiisa **19aad**, faqradiisa 2aad ee sharcigan.
   - **t)** Cinwaanka xarunta dhexe ee shirkadda jirta.
   - **j)** Magaca saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha loogu diro qof kasta oo diiwaan gelinaya shirkadda.
   - **x)** In maamulka shirkadda jirta uu mas'uul ka yahay mid ama in ka badan oo maamule.
   - **kh)** In ugu yaraan uu jiro hal Saamile oo ay leedahay shirkaddu.
   - **d)** Hawsha ama hawlaha ay qabato shirkadda jirta iyadoo loo adeegsanayo fure/furayaal is fasiraya hanaankoodu oo ku tilaaman xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsiga soo saaray.
   - **r)** Arin kasta oo si kale u la xiriirta shirkadda jirta oo la diiwaan geliyay qoralkeeda diiwaan gelinta oo ay la noqoto in ay ku daraan shirkadda jirta qof ama ka badan.
2. Qoraalka diwaan gelinta shirkad jirta laguma sheegi karo taariikhda dhaqan gal dib loo dhigay.

## Qodobka 110aad

### *Saameynta Diiwaan Galinta Shirkad jirta*

1. Shirkadi waxay noqonaysaa shirkad jirta marka la diiwaan geliyo qoraalkeeda, diiwaan gelintuna noqoto mid dhaqan gal ah sidaasna ku noqoto shirkad jirta oo leh jiritaan habboon oo waafaqsan sharcigaan iyo shuruucda kale ee dalka u yaal.

## Qodobka 111aad

### *Ogaanshaha Jiritaanka Shirkad Jirta*

1. Xaqiiqda ah in qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta uu ku jiro diiwaannada diiwaan hayuhu, waxay u tahay ogaansho in shirkaddu tahay shirkad jirta oo lagu dhaqi karo sharcigan iyo dhammaan hab raacyada kale ee ku jira qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta ee uu waajibiyay kana hor imaaneyn qodobada sharcigan iyo shuruucda dalka dhaqan galka ka ah.

## Qodobka 112aad

### *Wax ka Beddelka Qoraalka Diwaan Gelinta Shirkad Jirta*

1. Iyadoo qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta wax looga beddeli karo waqtigii la doono ujeedo kasta, hadana waa in wax laga bedelaa marka:
   **b)** Uu is bedel ku yimaado magaca shirkad jirta.
   **t)** Ay ku jirto hadal been ah ama qalad ah qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta.
2. Wax ka beddelka qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta waa waxba kama jiraan, haddii aanay oggolaan dhammaan saamileyda ama aan loo ansixin hab kale ee uu dhigayo xeer hoosaadka shirkaddu.
3. Shirkad jirta, waxay wax uga beddelaysaa qoraalkeeda diiwaan gelinta, iyadoo u soo gudbinaysa codsi qoraalka wax ka beddelid ah Diiwaan hayaha si uu ugu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan sida uu qabo;
   **b)** Magac shirkadeedka shirkadda jirta
   **t)** Wax ka bedelka qoraalka diiwaan gelinta shirkad jirta iyo sida loo beddelayo.

## Qodobka 113aad

### *Shirkadaha Shisheeye ee Jira*

1. Shirkad kasta oo shisheeye ee jirta, waxa lagu dhaqayaa sharcigan, iyadoo aan wax loogu dhimeyn xuquuqda iyo waajibaadka la xiriira shirkad shisheeye inta ay dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay ka fulinayaan hawlo iyo ganacsiba, isagoo

dhowraya ama daryeelaya dhammaan xuquuqaha saamileyda iyo maamuleyaasha shirkadda shisheeye si la mid ah shirkadaha kale ee dalka ama wadaniga ah.

## Qodobka 114aad

### *Diiwaan Gelinta Iyo Ciqaabaadka*

1. Shirkad kasta oo shisheeye ee jirta waa in ay isku diiwaan gelisaa soddon (30) maalmood gudohood ka dib taariikhda dhaqan galka sharcigaan, iyadoo u keeneysa diiwaan-hayaha codsiga qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay si loogu diiwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan.
2. Shirkad kasta oo shisheeye ee jirta oo ku guul dareysta ama diidda in ay u keento diiwaan-hayaha codsi diiwaan gelin qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay si loogu diiwaan geliyo ama bixin weyda khidmadda adeegga muddada ku xusan qodobkan faqradiisa1aad, waxay muteysanaysaa ciqaab ganaax waafaqsan qodobka **86aad** ee sharcigan.

## Qodobka 115aad

### *Oggolaanshaha La Siiyay Shirkad Shisheeye ee Jirta*

1. Qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jirta waa in uu dhigaa:
   **b)** Magaca shirkadda shisheeye ee jirta oo waafaqsan cutubka 3aad ee sharcigan, qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay shirkadda shisheeye ee jirta loona gudbiyo diiwaan-hayaha si uu u diiwaan geliyo soddon (30) maalmood gudohood ka dib taariikhda dhaqan galka sharcigan.
   **t)** cinwaaka xarunta dhexe ee shirkada shisheeye ee jirta.
   **j)** Magaca saxda ah iyo cinwaanka waraaqaha mid kasta oo ka mid ah dadka danta ku leh shirkadda loogu gudbinayo qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay diiwaan hayaha si uu u diiwaan geliyo.
   **x)** Hawshaas ama hawlaha ay qabatay shirkadda shisheeye ee jirta iyadoo u adeegsanayo fure ama furayaal is fasira si waafaqsan habka uu ku tilmaamayo xeer nidaamiyaha Wasiirka Ganacsigu.
   **kh)** Arrimihii kale ee la xiriira shirkadda shisheeye ee jirta ama qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay shirkadda shisheeye ay go'aansato in uu ku daro qofka iyo ka badan una soo gudbiyaa diiwaan-hayaha si uu u diiwan geliyo.
2. Qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay shirkad shisheeye oo jirta ma sheegi karto taariikhda dhaqan gal dib loo dhigay.

## Qodobka 116aad

### *Diiwaan galinta oggolaanshaha Shirkad Shisheeye*

1. Shirkad shisheeye, waxay noqonaysaa shirkadd jirta marka la diiwaan geliyo qoraalkeeda oggolaanshaha lagu siiyay dhaqan galna uu noqdo, shirkadda shisheeyana ku noqota mid jiritaankeedu sharciga waafaqsan yahay.

## Qodobka117aad

### *Ogaanshaha Shirkad Shisheeye Jiritaankeeda*

1. Jiritaanka shirkadda shiisheeye xaqiiqdeedu waa marka la geliyo diiwanada diiwan hayaha qoraalka ogolaanshaha lagu siiyay Shirkad shisheeye oo jirta, waxayna ogaal u tahay shirkadda shisheeye jiritaankeeda laguna dhaqayaa sharcigan. Sidoo kale waa u ogaal dhammaan xaqiiqooyinka kale ee shirkadda ugu jira diiwannada ee uu shardi ka dhigay sharcigani in diiwannada diiwan hayaha lagu xuso.

## Qodobka 118aad

### *Beddelaadda Oggolaanshaha Shirkad Shisheeye ee jirta*

1. Qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay shirkad shisheeye ee jirta waxba lagama beddeli karo waqti iyo ujeeddo kasta, marka;
   **b)** Is beddel ku yimaado magaca shirkadda shisheeye ee jirta.
   **t)** Laga helo wax been ama qalad ah qoraalka oggolaaanshaha lagu siiyay shirkada shisheeye ee jirta.
2. Shirkad shisheeye ee jirta wax ka beddelna ku sameeysa qoraalkeeda oggolaanshaha lagu siiyay waa in ay u keento diiwaan hayaha codsi qoraal wax ka bedelid qoraalkeedii oggolaanshaha lagu siiyay, si uu ugu diwaan geliyo si waafaqsan qodobka **13aad** ee sharcigan, wax ka beddelkaas oo sheegaya:
   **b)** Magaca shirkadda shisheeye ee jirta
   **t)** Wax ka beddelka qoraalka oggolaanshaha lagu siiyay shirkadda shisheeye ee jirta.

## Qodobka 119aad

### *Xeer Nidaamiye Wasiir*

1. Diiwaan hayuhu, wuxuu ka hab raacayaa diiwan gelinta dhamaan shirkadaha jira iyo kuwa bilowgaba habka uu tilmaamo xeer nidaamiyaha wasiirka gaacsiga.

2. Xeer nidaamiyahaas wasiirku kama cudur daari karo shirkadaha bixinta waajibaadka adeegga diiwaan gelinta iyo habkoodaba ee ku xusan qodobada sharcigan, sida cawaaqibka ka dhasho guul daraysiga diiwaan gelinta.

## Qodobka 120aad

### *Awoodda Beddelka iyo Laalista Sharcigan*

1. Baarlamaanku, wuxuu awood u leeyahay in uu wax ka beddelo qeyb ka mid ah, ku kordhiyo ama laalo dhammaan sharcigan mar kasta oo ay ula muuqato in uu san ka jawaabeyn danta dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhammaan shirkadahana, waxaa lagu dhaqi doonaa isbeddelkaas.

## Qodobka 121aad

### *Baab'in*

1. Sharcigan waxaa lagu baab'inayaa dhammaan shuruucda iyo xeerarka ka hor-imaanaya ee dhaqan galka ka ahaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 122aad

### *Dhaqan Galka Sharcigan*

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya kuna soo baxo Faafinta Rasmiga ah.

## Tusmo


**CUTUBKA 1AAD ........ 2**

**Qodobka 1aad ........ 2**

**Ujeeddada Sharciga ........ 2**

**Qodobka 2aad ........ 2**

**Eray Bixin ........ 2**

**Qodobka 3aad ........ 6**

**Magaca Sharcigan ........ 6**

**Qodobka 4aad ........ 6**

**Fasiraadda Sharciga ........ 6**

**CUTUBKA 2AAD ........ 6**

**AWOODAHA SHIRKADAHA IYO HAWLAHOODA ........ 6**

**Qodobka 5aad ........ 6**

**Ujeeddada Shirkad Ganacsi ........ 6**

**Qodobka 6aad ........ 7**

**Shakhsiyadda Qaanuuniga ah ........ 7**

**ee Shirkadaha ........ 7**

**Qodobka 7aad ........ 7**

**Noocyada Shirkadaha ........ 7**

**Shirkad kasta oo doonaysa in la diwaan geliyo ........ 7**

**waa in ay ahaato ........ 7**

**Qodobka 8aad ........ 7**

**Sifooyinka Shirkad Gaar ah ........ 7**

**iyo Shirkad Dadweyne ........ 7**

**Qodobka 9aad ........ 8**

**Adeegsashada Awood Qaldan** ........ 8
**Qodobka 10aad** ........ 8
**Xiriirrada ganacsi ee dibedda** ........ 8
**Qodobka 11aad** ........ 8
**Masuuliyadda Saamileyda** ........ 8
**CUTUBKA 3AAD** ........ 8
**AASAASIDDA** ........ 8
**Qodobka 12aad** ........ 8
**Aasaasidda Shirkadaha** ........ 8
**Qodobka 13aad** ........ 9
**Qoraalka Aasaasidda** ........ 9
**Qodobka 14aad** ........ 9
**Dhaqan galka diiwaan gelinta** ........ 9
**qoraalka aasaaska** ........ 9
**Qodobka 15aad** ........ 9
**Wax-ka-beddelka Qoraalka Aasaasidda** ........ 9
**CUTUBKA 4aad** ........ 10
**MAGACYADA SHIRKADAHA** ........ 10
**Qodobka 16aad** ........ 10
**Magaca Shirkadda** ........ 10
**Qodobka 17aad** ........ 10
**Magac Shirkadeedka Shirkad La Kala Diray** ........ 10
**Qodobka18aad** ........ 10
**Magaca shirkad kacday** ........ 10
**Qodobka 19aad** ........ 10

Magac shirkadeed dhigaal ah........ 10
Qodobka 20aad........ 11
Qaadashada Magaca Shirkad shisheeye........ 11
Qodobka 21aad........ 11
Magaca shirkad shisheeye........ 11
CUTUBKA 5AAD........ 11
SAAMILEY........ 11
Qodobka 22aad........ 11
Saamiley Cusub........ 11
Qodobka 23aad........ 11
Wareejinta Danta Shirkadda........ 11
Qodobka 24aad........ 12
Deynta Shirkadda iyo Saamile/Saamileyda........ 12
Qodobka 25aad........ 12
Saamilaha Geeriyooda iyo Shirkadda........ 12
Qodobka 26aad........ 13
Xilka Saamilayda iyo Maamulka........ 13
Qodobka 27aad........ 13
Codaynta Saamileyda........ 13
Qodobka 28aad........ 13
Dacwad Saamile........ 13
Qodobka 29aad........ 13
Dacwad Oogid Saamile........ 13
Qodobka 30aad........ 14
Asbaabta Hakinta Dacwadaha........ 14

**Qodobka 31aad** .......... **14**

**Diidmada Dacwada** .......... **14**

**Qodobka 32aad** .......... **14**

**Joojinta Dacwadda** .......... **14**

**Qodobka 33aad** .......... **14**

**Kharashka Dacwadda** .......... **14**

**Qodobka 34aad** .......... **15**

**Dhowridda Sirta Diiwaanada iyo Xisaabaadka** .......... **15**

**CUTUBKA 6aad** .......... **15**

**MAAMULKA** .......... **15**

**Qodobka 35aad** .......... **15**

**Magacaabista Maamule** .......... **15**

**Qodobka 36aad** .......... **15**

**Awoodda Maamulka Shirkadda** .......... **15**

**Qodobka 37aad** .......... **16**

**Howl-wadeennada iyo wakiillada** .......... **16**

**Qodobka 38aad** .......... **16**

**Waajibaadka Saamilayda iyo Maamuleyaasha** .......... **16**

**Qodobka 39aad** .......... **17**

**Reebanaanta Wakiilnimada Saamilayda** .......... **17**

**Qodobka 40aad** .......... **17**

**U cawil-celinta iyo Dammaanad Qaadidda** .......... **17**

**CUTUBKA 7aad** .......... **17**

**MAALIYADDA** .......... **17**

**Qodobka 41aad** .......... **17**

Qaabka Isku Darsiga ........ 17
Qodobka 42aads ........ 17
Masuuliyadda Bixinta Raasamaalka Shirkada ........ 17
Qodobka 43aad ........ 18
........ 18
CUTUBKAAAD ........ 18
QEYBINTA IYO IS-CASILAADDA ........ 18
Qodobka 44aad ........ 18
Qeybinta Hor Dhac ah ........ 18
Qodobka 45aad ........ 18
Is-casilaadda Saamilaha ........ 18
Qodobka 46aad ........ 19
Xuquuqda Saamilaha Baxaya ........ 19
Qodobka 47aad ........ 19
Dib U Qaybin Aan la Samayn Karin ........ 19
Qodobka 48aad ........ 19
Qaybsiga dheefta Saamiga ........ 19
Qodobka 49aad ........ 19
........ 19
CUTUBKA 9AAD ........ 20
ISKU-BIIRIDDA SHIRKADAHA ........ 20
Qodobka 50aad ........ 20
Isku Biiridda Shirkado ........ 20
Qodobka 51aad ........ 20
Qaabka Isku Biirista ........ 20

**Qodobka 52[aad]** ........ 21
**Ansixinta Isku Biiridda** ........ 21
**Qodobka 53[aad]** ........ 21
**Dhaqan-galka Isku Biiridda** ........ 21
**Qodobka 54[aad]** ........ 22
**Raadka isku Biiridda** ........ 22
**Qodobka 55[aad]** ........ 23
**Shirkad shisheeye oo ka hartay isku biiridda** ........ 23
**Qodobka 56[aad]** ........ 23
**Xuquuqda Saamilayda laga cod batay** ........ 23
**CUTUBKA 10[aad]** ........ 24
**KALA DIRIDDA** ........ 24
**KALA DIRIDDA IKHTIYAARIGA AH** ........ 24
**Qodobka 57[aad]** ........ 24
**Waqtiga Kala Diridda** ........ 24
**Qodobka 58[aad]** ........ 24
**Wargelinta Qoraalka kala diridda** ........ 24
**Qodobka 59[aad]** ........ 25
**Raadka Kala Diridda** ........ 25
**Qodobka 60[aad]** ........ 25
**Xisaabinta iyo Dhammeynta Shirkadda** ........ 25
**Qodobka 61[aad]** ........ 25
**Maamulaha iyo Saamilaha Xilliga Kala Diridda** ........ 25
**KALA DIRIDDA GARSOORKA** ........ 26
**Qodobka 62[aad]** ........ 26

Garsoorka iyo Kala Diridda ........ 26
Qodobka 63aad ........ 27
Garsoorka Lagu Kala Dirayo ........ 27
Qodobka 64aad ........ 27
Guddoomiye/Ilaaliye ........ 27
Qodobka 65aad ........ 28
........ 28
Qodobka 66aad ........ 29
Kala Diridda Wakhtigeedu Dhacay ........ 29
Qodobka 67aad ........ 29
Kala Diridda Shirkad Isbixin weydey ........ 29
ama Sharcigana U Hoggaansami weydey ........ 29
Qodobka 68aad ........ 29
Kala Diridda Shirkad ........ 29
Qodobka 69aad ........ 30
Dacwad Joojinta ........ 30
Qodobka 70aad ........ 30
Joojinta dacwad Faafin Ka Dib ........ 30
Qodobka 71aad ........ 31
Fulinta Dacwadaha Shirkad La Kala Diray ........ 31
CUTUBKA 11AAD ........ 31
WAR-BIXIN SANNADEEDKA ........ 31
Qodobka 72aad ........ 31
Warbixin sanadeedka ........ 31
CUTUBKA 12AAD ........ 32

**FAL SHARCI DARRO EE SHIRKADI GELI KARTO** ........ 32
**Qodobka73aad** ........ 32
**Qodobka 74aad** ........ 33
**Cawaaqibka Fal Sharci Darro** ........ 33
**Qodobka 75aad** ........ 33
**Saamaynta Fal Sharci Darro** ........ 33
**Qodobka 76aad** ........ 34
**Sixidda falka Sharci daro ee Shirkadda** ........ 34
**Qodobka77aad** ........ 35
**Racfaanka Falka Sharci Darro** ........ 35
**CUTUBKA 13AAD** ........ 35
**SOO CELINTA SHIRKAD LA KALA DIRAY** ........ 35
**Qodobka 78aad** ........ 35
**Soo Celinta Shirkad La Kala diray** ........ 35
**Qodobka 79aad** ........ 35
**Oggolaanshaha iyo Diidmada** ........ 35
**Qodobka 80aad** ........ 36
**Dib-u-Dhaqan Gelin Shirkadeed** ........ 36
**Qodobka 81aad** ........ 36
**Dib-u-soo Celin Magac Shirkadeed** ........ 36
**Qodobka 82aad** ........ 37
**Saameynta dib-u-Dhaqan-Gelinta Shirkad** ........ 37
**CUTUBKA 14AAD** ........ 37
**DIIWAAN GELINTA QORAALADA MAAMULKA** ........ 37
**Qodobka 83aad** ........ 37

**Shuruudaha Diiwaan Gelinta Shirkadaha ........ 37**
**Qodobka 84aad ........ 39**
**Been Abuurka Qoraallada Diiwaan Gelinta ........ 39**
**Qodobka 85aad ........ 39**
**Foomamka iyo Bixintooda ........ 39**
**Qodobka 86aad ........ 39**
**Khidmadaha iyo Ciqaabaadka ........ 39**
**Qodobka 87aad ........ 40**
**Dhaqan Galka Diiwaangelinta ........ 40**
**Qodobka 88aad ........ 41**
**Diiwaan Gelinta Qoraal Dib loo Saxay ........ 41**
**Qodobka 89aad ........ 42**
**Sixidda Qoraal La Diiwaan-geliyay ........ 42**
**Qodobka 90aad ........ 42**
**Wax ka Beddelka Qoraalka ........ 42**
**Qodobka 91aad ........ 43**
**Beddelidda Ciwaanka Xarunta dhexe ee Shirkadda ........ 43**
**Qodobka 92aad ........ 43**
**Waajibka iyo Hannaanka Diiwaan-hayaha ........ 43**
**Qodobka 93aad ........ 45**
**Racfaanka Diidmada Diiwaan-gelinta ........ 45**
**Qodobka 94aad ........ 45**
**Caddeymaha Diiwaan-gelinta ........ 45**
**Qodobka 95aad ........ 46**
**Diiwaan-hayuhu Shahaadooyinka Uu Bixiyo ........ 46**

Qodobka 96aad ..... 46
Diidmada Diiwaan-gelin Qoraal ..... 46
Qodobka 97aad ..... 46
Awoodaha Wasiirka ..... 46
Qodobka 98aad ..... 47
Ogaysiisyada Diiwaan-hayaha ..... 47
CUTUBKA 15AAD ..... 47
SHIRKADAHA SHISHEEYE ..... 47
Qodobka 99aad ..... 47
Waajibnimada iyo Ogolaanshaha Shirkad Shisheeye ..... 47
Qodobka 100aad ..... 48
..... 48
Qodobka 101aad ..... 49
Oggolaansho Siinta Shirkad Shisheeye ..... 49
Qodobka 102aad ..... 49
Wax ka Beddelidda Qoraalka Oggolaanshaha ..... 49
Qodobka 103aad ..... 49
Saameynta Qoraalka Oggolaansho Siinta ..... 49
Qodobka 104aad ..... 50
Ogolaansho kala Noqosho Shirkad Shisheeye ..... 50
Qodobka 105aad ..... 51
Wargelin dib ula Noqosho Oggolaansho Shirkad Shisheeye ..... 51
Qodobka 106aad ..... 51
Shirkad shisheeye Oo Diiwaan Hayuhu Diiwaan geliyey ..... 51
CUTUBKA 16AAD ..... 51

**QODOBBADA KALA DUWAN EE KALA GUURKA** .................................................... **51**

**Qodobka 107aad** .................................................... **51**

**Shirkadaha Jira** .................................................... **51**

**Qodobka 108aad** .................................................... **52**

**Diiwaan Gelinta iyo Ciqaabaadka** .................................................... **52**

**Qodobka 109aad** .................................................... **52**

**Diiwaan Gelinta Shirkad Jirta** .................................................... **52**

**Qodobka 110aad** .................................................... **53**

**Saameynta Diiwaan Galinta Shirkad jirta** .................................................... **53**

**Qodobka 111aad** .................................................... **53**

**Ogaanshaha Jiritaanka Shirkad Jirta** .................................................... **53**

**Qodobka 112aad** .................................................... **53**

**Wax ka Beddelka Qoraalka Diwaan Gelinta Shirkad Jirta** .................................................... **53**

**Qodobka 113aad** .................................................... **53**

**Shirkadaha Shisheeye ee Jira** .................................................... **53**

**Qodobka 114aad** .................................................... **54**

**Diiwaan Gelinta Iyo Ciqaabaadka** .................................................... **54**

**Qodobka 115aad** .................................................... **54**

**Oggolaanshaha la Siiyay Shirkad Shisheeye ee Jirta** .................................................... **54**

**Qodobka 116aad** .................................................... **55**

**Diiwaan galinta oggolaanshaha Shirkad Shisheeye** .................................................... **55**

**Qodobka117aad** .................................................... **55**

**Ogaanshaha Shirkad Shisheeye Jiritaankeeda** .................................................... **55**

**Qodobka 118aad** .................................................... **55**

**Beddelaadda Oggolaanshaha Shirkad Shisheeye ee jirta** .................................................... **55**

**Qodobka 119aad** .................................................. **55**

**Xeer Nidaamiye Wasiir** .................................................. **55**

**Qodobka 120aad** .................................................. **56**

**Awoodda Beddelka iyo Laalista Sharcigan** .................................................. **56**

**Qodobka 121aad** .................................................. **56**

.................................................. **56**

**Qodobka 122aad** .................................................. **56**

**Dhaqan Galka Sharcigan** .................................................. **56**